

Kusoodhawaada Carriga Maraykanka

Buugga Tilmaamaha Qaxootiga

Somali



E

M

O

C

L

E

M

CAL

KUSOO DHAWAADA CARRIGA MARAYKANKA

Buugga Tilmaamaha qaxootiga

Tifaftirkii Saddexaad
2004

Buuggan waxaa diyaarisay Xarunta u gaarka ah luqadaha
Laanteedda kaydka Hanuuninta Dhaqameed
Waashinton, DC

Qoritaanka labadii tifatir ee ugu horreeyay ee buuggan “Kusoo Dhawaada Carriga Maraykanka: Buugga Tilmaamaha Qaxootiga” waxaa gacan ka gaystay wakiillo ka kala socda hay’adaha hoos ku taxan:

African Services Committee of New York
Center for Applied Linguistics
Church World Service
International Catholic Migration Commission
International Institute of Erie, Pennsylvania
International Organization for Migration
International Rescue Committee
Iowa Department of Human Services
Jewish Family Services of Baltimore
Lutheran Social Services of Fargo, North Dakota
Lutheran Social Services of the National Capitol Area
Maryland Office of Refugee Affairs
Office of Refugee Resettlement
Refugee Services Alliance of Houston
United States Catholic Conference of Bishops
World Relief

Wakiilada hay’adaha aan kor ku soo sheegnay waxaa kusoo biray wakiillo kale oo ka kala socda hay’adahan hoos ku taxan oo ayaguna gacan ka gaystay soo daabicidda iyo tifaftirka nuqulkan cusub ee buugga:

Arlington Refugee Services, Catholic Diocese
of Arlington, Virginia
Hebrew Immigrant Aid Society
Immigration and Refugee Services of America

Ururadan soo socda ayaa ku deeqay sawirada ku daabacan buugga:

Arizona International Refugee Consortium, Inc.
Center for Applied Linguistics
Lutheran Social Services of Fargo, North Dakota
Lutheran Social Services of the National Capital Area
PhotoDisc Inc.
SAGART design

Jeldiga

Chroma Design

Naqshadda gudaha iyo soo saarka

SAGARTdesign

“Kusoo dhawaada Carriga Maraykanka: Buugga Tilmaamaha Qaxootiga” Waa buug loogu talo-galay hanuuninta iyo tilmaan-siinta qaxootiga lasoo dejiyay carriga Maraykanka, waxaanu warbixin guud ka bixiyaa waxyaabaha ay la kulmi doonaan iyo adeegyada loogu talo-galay bilaha ugu horreeya ee ay waddanka ku cusub yihiin; hadday tahay dhinaca dhaqaalaha, dhinaca wax-barashada, dhinaca caafimaadka iyo arimo kale oo ku saabsan nolosha carriga Maraykanka.

Qoritaanka buugan hanuuninta qaxootiga waxa soo agaasimay the Bureau of Population, Refugees, and Migration, the U.S. Department of State oo ah Xafiiska Tira-koobka, Qaxootiga iyo Amigreeshinka (laanta socdaalka) ee Waaxda arimaha dibedda ee Maraykanka. Xogta buugga ku qoran waxa ku tabarucay madax ka socota dawladda Federaaliga ah, madax ka tirsan gobolada, wakiillo ka socda hay'daha dib-u-dejinta iyo dad ka tirsan qaxootiga dhawaanta la dejiyay.

Buuggan oo ku turjuman dhowr luqadood, waxaa loo qaybiyaa xarumaha qaxootiga ee deggan dalka debaddiisa iyo dadka qaxootiga ah ee loo ogolaaday inay yimaadaan dalka Maraykanka aanse weli arimahooda la maarayn. Waxaa kaloo buuggan loo qaybiyaa hay'adaha u adeega dib-u-dejinta qaxootiga si ay u ogaadaan macluamadka ay qaxootigu heleen kahor intaanay iman carriga Maraykanka.

Buuggan hanuuninta qaxootiga ee la magac baxay: “Kusoo Dhawaada Carriga Maraykanka: Buugga Tilmaamaha Qaxootiga” wuxuu badalay nuqul (tifaftir) hore oo ku saabsanaa tilmaamaha hawlaha dib-u-dejinta ee Maraykanka gudahiisa.

Buugan tilmaamaha qaxootiga gebi ahaantiiba waa la daabacan karaa. Hase yeeshe, sawirrada buugga iyo hadalada lasoo xigtay ee ku qoran toona looma isticmaali karo buug kale amase ujeeddo kale haddaan ogolaansho qoraal ah laga soo qaadan hay'daha samo-falka ee bixiyay deeqdii buuggan lagu hirgeliyay.

Hordhac	3
Ka hor intaanad iman Dalka Maraykanka	7
Hay'dda Dib-U-Dejinta	17
Adeegyada Degaanka	21
Guri-siinta	29
Gaadiidka	37
Shaqaalaynta	41
Waxbarashada	59
Caafimaadka	71
Maamulka Lacagta	79
Xuquuqda iyo waajibaadka dadka qaxooti ahaan ku yimaadda Maraykanka	87
La qabsashada dhaqanka cusub iyo isbeddalka iyo kaalinta qofka	95



Kusoo dhawaada Hanuuninta Dhaqameed!



Buugan tilmaamaha ee “Kusoo Dhawaada Dalka Maraykanku” wuxuu idin caawinayaa dhawrka bilood ee ugu horreeya eed ku cusub tihiiin Dalka Maraykanka. Wuxuu idiin tilmaamayaa waxaad la kulmi doontaan (filan kartaan) markaad raadsanaysaan guri aad ku noolaataan iyo shaqo, iyo waxaad odhanaysaan markaad la kulantaan dad Maraykan ah. Waxaa kaloo buugani idin barayaa sidaad ula qabsan lahaydeen dhaqanka Maraykanka iyo bulshadooda.

Dib-u-dejinta qaxootigu waa hawl adag oo qaadata waqti dheer, waxaana laga yaabaa inaydaan buuggan ka wada heli karin su’aalahaad qabtaan jawaabahooda. Haddaad qabtaan su’aalo aanu buugani ka jawaabi karin, ama aydaan fahmin waxyaalo ku qoran, waa inaad weydisaan shaqaalaha xarunta maaraynta (JVA, OPE) amma hay’adihiinna dib-u-dejinta. Iyaga ayaa idinku caawin kara macluumaadka aad u baahantihiiin.

Dalka Maraykanka

Dalka Maraykanku waa dal aad u balaadhan oo leh dabeecado iyo cimilooyin kala gedisan. Dadku waxay u wada deganyihiin si badhax ah, degmo walbana waxay leedahay sharci maxalli ah oo ayada u gaar ah iyo nidaam ay kula shaqeeyaan qaxootiga cusub. Sidaa darteed, lagama yaabo inay run tahay waxaad hore uga maqashay dalka Maraykanka, xataa haddaad ka maqashay ehel amma asxaab joogta xaggaa. Shaqaalaha hay’adda Dib-u-dejinta ayaa kugu caawin karta inaad wax ka barato degaankaaga cusub si aad u fahamto waxaad filanayso.

Aqoonta Af-Ingiriisiga ayaa aad muhiim ugu ah inaad ku guulayasato noloshu Maraykanka. Waad heli kartaa shaqo xataa haddaanad ku hadal Afka Ingiriisiga, laakinse shaqooyinka aad heli karto ayaa noqonaya kuwo xadidan. Barashada Af-Ingiriisigu waxay kugu caawinaysaa inaad shaqo fiican hesho, inaad la socoto ubadkaagu waxay iskuulka ku baranayaan; iyo inaad asxaab cusub ku yeelato degaankaaga.



Dadka Maraykanka

Dadka Maraykanka ah badankoodu waxay aad u qiimeeyaan iskulkalsonaanta iyo shaqo badnaanta. Waxay filayaan inay dadka qaxootiga ahí isla markiiba shaqo helaan si ay naftooda iyo ta faamiligooda wax u taraan. Waxa kalooy filayaan in dadka aan ku hadli Karin Af-Ingiriisigu si degdeg ah u baran doonaan.

Dadka Maraykanku waxay sharfaan qofka wax su'aala. Waxay rumaysanyihiin haddaad wax weydiiso in aad tahay qof dadaalaya oo doonaya inuu wax barto waxna fahmo. Haddaanad aqoon sida wax loo qabto, haka baqin inaad wax weydiiso dadka. Dadka Maraykanka badidoodu waxay jecelyihiin inay ku caawiyaan.

Lagasoo bilaabo bishii Sebtaambar ee sanadka 2001, qaaar kamid dadka Maraykanka ayaa ka aamin-ka-baxay dadka aan u labisan sida reer galbeedka amma u muuqda dad ajanebi ah. Dad aad u yar ayaa laga yaabaa inay muujiyaan cadho iyo af-lagaaddo amma tuhun. Laakiin dadka Maraykanka badidoodu way idin soo dhawayn doonaan, waxaanay jecelyihiin inay wax ka bartaan dhaqankaaga. Haddaad la kulanto wax colaad ah, la socodsii hawl-wadeenada hay'addaada. Iyaga ayaa kuu sheegi doona waxaad yeeli lahayd.

Arrimaha ku saabsan dib-u-dejinta.

Dib-u-dejintu waxay wax ka badashaa noloshada. Waa talaabada koowaad ee kuu horseedi karta inaad ku hesho ogolaansho rasmi ah ood weligaaba ku joogto dalka Maraykanka amma aad ku noqon karto waddani Maraykan ah. Qaxootiga adiga kaasoo horreeyay waxay yidhaadaan qaxootiga cusubi waxay fursad u helaan inay dib u dhisaan noloshooda. Wax kasta inaad dib usoo bilawdaa ma hawl yara, laakiin waa wax lagu guulaysan karo. Waxa adiga kaa soo horreeyay in ka badan labo malyuun oo qaxooti ah, dhammaantoodna way guulaysteen. Adiga naftaaduna waad guulaysan kartaa, haddaad la kaashato maskaxdaada, aqoontaada iyo geesinimadaada.

Waxaan kuu rajaynaynaa caafimaad!



Maa daama ay waaxda adeegga jinsiyadda iyo amigreeshinku (USCIS) ay kuu ogolaadeen inaad soo gasho carriga Maraykanka, waxaad u baahantahay inaad qaaddo dhawr talaabooyin oo kale kahor intaanad safrin. Waa in adiga iyo xubnaha qooyiskaaguba aad ka gudubtaan baadhista caafimaad iyo baadhista nabad-sugidda. Xarunta maaraynta hawlaha dhoofka ayaa macluumaadkaaga u gudbisa xafiiska ay hay'adda dib-u-dejintu ku leedahay Maraykanka. “International Organization for Migration (IOM)”— Ururka Caalamiga ah ee Carro-geddiska ayay waajib ku tahay inuu qalqaaliyo dhoofkaaga. Intaad sugayso dhoofkaaga, waxaad qaadan doontaa casharro Af-Ingiriisi ah iyo aqoon guud oo ku saabsan dalka iyo nolosha maraykanka, hadday suurtagal noqoto.

Baadhista Caafimaadka

Dammaan xubnaha faamiligaaga waxaa looga baahanyahay baadhista caafimaad. Baadhistaanku waa lacag laan, waxaana ballanta kuu samaynaya hawl-wadeen ka tirsan shaqaalaha Xarunta Maaraynta Hawsha. Faa-iidada baadhista caafimaadku waxay tahay:

- in la ogaado hadduu jiro qof kamid ah faamiligaaga ah oo ay haysato dhibaato caafimaad, oo loo baahanyahay in wax laga qabto, iyo
- in la hubiyo in adiga iyo xubnaha faamiligaagu toona aanay qabin cudurada la kala qaado, kuwaasoo adiga iyo xubnaha faamiligaba u diidaya inay u safraan Dalka Maraykanka.
- in la siiyo hay'addaada qaxootiga (dib-u-dejinta) wax alla iyo wixii macluumaad ah ee ku saabsan xaaladahaaga caafimaad ee u baahan xannaano gaar ah kadib markaad timaaddo degaankaaga cusub.

Waqtigan xaadirka ah, natiijada baadhista caafimaadku waxay ku dhacdaa 1 sano, inkastoo sharcigaasi is-badali karo mustaqbalka. Kadib marka baadhista caafimaad lagu sameeyo, haddaanad sannad gudihiis ku safrin, waa inaad samaysaa baadhista caafimaad kale intaanad u baqoolin carriga Maraykanka. Dadka ayagu qaba xanuunno gaar ah, sida TB-da, HIV-da, baadhista caafimaadku waxay waartaa 6 bilood oo keliya.



Nabad-gelyo-sugidda

Dhammaan dadka qaxootiga waxaa laga rabaa inay haystaan warqadda nabad-gelyo sugidda oo ah warqad caddaynaysa inaanay ahayn dad danbiilayaal ah oon khatar ku ahayn nabadgelyada, waxaana ku hubiya madax ka tirsan dawladda kahor intaanad u safrin Carriga Maraykanka. Caadi ahaan nabadgelyo-sugidda waxaa la fuliyaa kahor inta aanu waraysi kula yeelan ururka USICS. Mararka qaarkood waxa loo baahdaa in lagula yeesho waraysi kale oo nabad-sugideed kahor inta aanad ka ambabixin dalkaad joogto.

Ballanqaadka Hay'adda Dib-u-dejinta (Isboonsarka)

Qaxooti kasta oo loo ogolaaday inuu dego dalka Maraykanka waxaa loo xilsaaraa hay'ad dib-u-dejineed (isboonsar) kahor intaanu dhoofin. Rugta maaraynta dhoofka ayaa u gudbisa hay'adda dib-u-dejinta macluumaadkan hoos ku taxan ee adiga kugu saabsan:

- Magacaaga, da'daada, heerka tacliintaada iyo xirfaddaada
- Magacyada, da'da, heerka tacliinta, iyo xirfadaha xubnaha faamiligaaga ka tirsan ee kula socda.
- Jinsiyaddaada, dalkaad ka timid iyo diintaada

Ka hor intaanad iman Carriga Maraykanka



- Hadday jiraan dhibaatooyin caafimaadkaaga la xidhiidha oo u baahan in wax laga qabto markaad timaaddo Maraykanka.
- Magacyada, cinwaanada, iyo tilifoonada ehelkaaga hore usii degganaa Maraykanka.

Macluumaadkan ku saabsan ehelkaaga deggan Maraykan wuxuu u fududeeyaa hay'adda Dib-u-dejintu inay kuu doorto meesha lagu dejin lahaa. Haddii ay jiraan xigto soke oo hore usii joogtay Maraykanka, ood tilifoonkooda iyo cinwaankooda siiso Rugta Maaraynta Ambabaxa (dhoofka), hay'addu waxay ku dadaali doontaa inay ku dejiso magaalada ay deganyihiin. Haddaad codsato in lagu ag-dejiyo qof saaxiibkaaga ah ama qaraabadaada ah, oon ahayn ilmo aad dhashay, waalidkaa, walaalkaa ama walaashaa, hay'addu waxay marka hore hubin doontaa inay meeshu tahay meel aad ka heli karayso adeegyada aad u baahantahay iyo inay tahay meel aad shaqo ka heli karto iyo in kale.

Haddaad ka codsato, hay'addu way tixgelin doontaa in lagula dejiyo qaraabo aan ahayn xigto soke, hase yeeshee ma dammaanad qaadayso.

Haddii hay'adda dib-u-dejintu aanay haynin macluumaadka faamiligaaga iyo asxaabtaada deggan Maraykanka, waxaa dhici karta in lagu dejiyo magaalo aad uga fog iyaga. Waa inaad ku dadaashaa inaad



siiso rugta maaraynta ambabaxa wixii aad macluumaad hayso si ay ugu suurtoowdo hay'adda dib-u-dejinta inay kuu doorto meel kugu habboon. Bixinta macluumaadka ku saabsaan xigtadaada iyo qaraabadaadu wax saamayn ah kuma laha dedejinta maaraynta arrimaha amigreeshinkaaga iyo ambabaxaaga. Waxa keliya eey saamayn ku leedahay waa meesha lagaa dejin doono Maraykanka. Adiga ayay dantaada tahay in aad bixiso macluumaadkaas.

Marka ay hay'adda dib-u-dejintu go'aansato meesha lagu dejin doono, shaqaalaha hay'adda ayaa go'aankooda u gudbin doona rugta maaraynta ambabaxa. Ambabaxaaga kahor, waxaa lagu sheegi doonaa meesha aad kaga noolaan doonto Dalka Maraykanka.

Qabanqaabada Ambabaxa iyo Qaanta Ambabaxa:

Qabanqaabada ambabaxaaga (socdaalka, safarkaaga) waxaa fuliya Ururka Caalamiga ah ee Carro-geddiska IOM, asgaana kuu sheegi doona taariikhda aad u ambabixi doonto Maraykanka. Familiaaga waxaa loo ogolyahay inay qaataan lacag qaan (deyn) ah si ay u bixiyaan kharashka dhoofkooda. Xubin kasta oo kamid ah faamiligaaga da'diidsu/da'deedu ka weyntahay 18 sano waxay magaceeda ku qaadan kartaa lacag qaan ah waxaana laga saxexaa warqadda ballanqaadka qaanta oo ay xubintu ku ballan qaadayso inay iska bixin doonto qaanta

Ka hor intaanad iman Carriga Maraykanka



(deynta). Dhowr bilood kadib markaad timaaddo Maraykanka, hay'adda dib-u-ejinta ayaa bilaabi doonta inay bil walba kuusoo dirto “biil”aad ku bixiso qayb kamid ah qaanta lagugu leeyahay. Waxa lagaa rabaa inaad ku bixiso qaanta oo dhan saddex sano gudahood. Lacagtaad bixiso waxaa lagu shubaa fuundo loogu talo galay in lagu caawiyo qaxooti kale oo imanaya Maraykanka.

Bixitaankaaga qaantu wuxuu noqon doonaa talaabada kuugu horraysa eed ku muujin karto raad-raac qaan-baxineed oo wanaagsan (inaad tahay qof aamin ah).

Haddii ay dhacdo inay wax iska badalaan tirada faamiligaaga intaad amababaxa sugayaso, sida ilmo kuu dhashay oo kale, waa inaad degdeg ula socodsiiisaa ururka carro-geddiska caalamiga ah “IOM” amma shaqaalaha rugta maaraynta ambabaxa. Haddaanad sidaa yeelin waxaa dhici karta in ambabaxaagu dib u dhaco.

Kahor intaanad ambabixin, Shaqaale ka tirsan IOM ayaa ku siin doona buqshadda waraaqaha imaatinka. Waraaqaha waxaa kamid ah warqad lagu magacaabo I-94, warqadda kastamka, warqadda caafimaadka iyo raajada (X-reeyga), iyo waraaqaha dib-u-dejinta. Waa inaad ka digtoonaato waraaqaha intaad ku dhex jirto safarka. Waa inaad buqshadda waraaquhu ku jiraan mar walba hubisaa inaad hayso.

Ha furin, hana ku ridin shandaddaada.Waa inaad buqshadda waraaqaha u dhiibtaa madaxda waaxda socdaalka ee maddaarka aad kasoo gasho Maraykanka.

Bagaashka

Shirkadaha diyaaraduhu waxay xaddidaan xajmiga, culayska iyo tirada bagaashka qof walba qaadan karo. Waxaad diyaaradda la raaci kartaa hal xabbo oo bagaash ah (shandad) oon culayskeedu ka badnayn 5 kiilo (10 rodol). Waxaa kaloo qof walba loo ogolyahay in kaargo ahaan loogu raro labo xabbo oo bagaash ah oo midkiiba culayskiisu gaadhayo 32 kiilo (70 rodol). Waa inaad hubisaa in bagaashkaaga iyo shandadahaagu qufulanyihiin si aanay wax kaaga lumin intaad ku jirto safarka.

Laguuma ogola inaad diyaaradda la fuusho bagaash dhaafsiisan inta lagu xaddiday. Haddii aad sidato in ka badan inta lagu ogolyahay, waa inaad kaargoo ahaan kusii dirtaa adigoo kharashka ka bixinaya jeebkaaga.

Kastamyada Maraykanka waxaa ka reeban in lagala soo dego waxyaalaha qaarkood. Matalan, laguuma ogola inaad soo geliso dhir, midho, khudaar, hilib daray ah, iyo daawooyin. Waad lasoo geli kartaa daawo dhakhtar kuu qoray oo weel ku jirta, wadatana sumaddii iyo saxeexii dhakhtarka. Shandadahaaga kuma qaadan kartid qalab afaysan , sida middi amma maqas. Laakiinse waa lagu ogoloyahay inaad ku ridato bagaashka lagu rarayo ee la baadhi doono. Wax hub ah lama ogola inaad ku sidato bagaashkaaga. Haddaad su'aalo ka qabto waxaad qaadan karto iyo waxaanad qaadan karin, weydii shaqaalaha IOM.

Ku Talo-galka Gaar ahaaneed ee Dhoofka

Dhoofka lagu tegayo Maraykanku waa mid aad u dheer, sidaa darteed waa inaad kusii talo-gashaa safar dheer. Dhoofku (safarku) qof walba wuu daaliyaa, gaar ahaan carruurtana aad buu ugu adagyahay una dhibaa. Cunto sii carruurta, musqushana gee intaanay fuulin diyaaradda. Carruurta yaryar waa inaad usii qaaddaa dhiriq-dhawr “dhaaybar”. Ha illaabin inaad faamiligoo dhan ugu sii talo-gasho cuntooyin qasacadaysan.



Markay diyaaraddu sare kacayso iyo markay soo degaysaba, waxaa dhacda in dheguhu xidhmaan dadka saaran diyaaradda. Dadka waaeyn iyo carruurta liqitaanka iyo hamaahsiga ayaa u dawo ah ooy dheguhu ugu furmaan. Ku talo-gal inaad ilmaha cunta siiso wax yar kadib markay diyaaraddu idinla kacdo iyo wax yar kahor intaanay idinla fadhiisan. Markay liqaan caanaha amma juuska ayay u furmayaan dheguhu. Haddaad u baahan doonto kursiga curyaanka amma qalabka taageerada gaarka ah intaad ku jirto safarka, waa inaad la socodsiiisaa IOM. Sidoo kale, hadday jirto dawo dhakhtar kuu qoray, hore u sii qaado si aad u isticmaasho markaad u baahantahay.

Haddaad doonayso inaad la dhoofto xawayaan rabbaayadaysan (guri joog ah), waa inaad raacdaa sharciyada kastamyada iyo qawaaniinta dhoofinta xawayaanka , kharashka lagu dhoofinayaana waa dushaada. Waxaa muhiim ah inaad la socodsiiiso IOM haddii aad la dhoofayso xawayaan rabbaayadaysan si ay hay'adda dib-u-dejinta maraykanku kuugu sii raadiso guri la ogolyahay in xawaan lagu haysto.

Safarkaaga

Haddii safarkaaga looga baahanyahay inaad taraansit ahaan ugu sii hakato dhawr meelood kahor intaanad gaadhin Maraykanka, waxaa ku taakulayn doona IOM. Markaad soo gaadho Maraykanka, waxaa maddaarka kaaga hor iman doona wakiilo ka socda IOM kuguna

caawin doona sidii aad habsami usoo dhaafi lahayd kastamka adigoo raacaya qawaaniinta soo gelidda.


Madaxda waaxda amigreeshinka ayaa furi doona buqshadda waraaqaha imaatinka oo hubin doona inay waraaquhu dhanyihiin iyo in kale. Waxay kuu shaabadayn doonaan kaadhkaaga I-94 waanay kuusoo celin doonaan. Waxaa lagaa qaadi doonaa faraha, dabadeedna waxaa laga yaabaa in lagu siiyo Kaadhka Ogolaanshaha Shaqada (EAD) oo sawirkaagu ku yaallo. I-94-kaaga iyo kaadhka EAD waa kaadhad aad muhiim u ah waayo waxay caddaynayaan inaad si sharci ah ku jooogto dalka. Waa inaad ku xafiddaa meel aamin ah. Waxaa labadan kaadh ku waydiin doonta hay'adda dib-u-dejinta markaad tagto xafiiskooda waxaanay ka samaysan doonaan koobi. Haddii aad aragto wax khalad ah oo ka muuqda labadan kaadh, fadlan isla markiiba u sheeg madaxda joogta madaarka aad kasoo degto. Waxaa fudud in khaladka la saxo isla markiiba, adoon sugin ilaa intaad gaadhayso meesha ugu danbaysa ee lagu dejin doono.

Marka laanta socdaalku (amigreeshingku) kaa dhammaystaan hawlahooda, waxaad qaadan doontaa bagaashkaaga (shandadahaaga) waxaanad tegaysaa kastamka. Madaxda kastamka ayaa eegi doona warqadda kastamka waxaana laga yaabaa inay baadhaan bagaashkaaga. Mar haddii waxayaalaha ku jira bagaashkaagu ka gudbaan kastamka, waxaad u diyaar noqotaaba waa qaybtii ugu danbaysay ee safarkaaga.

Waxaaba laga yaabaa inaad ku dhaxdo madaarka waayo waxaa mararka qaarkood muddo aad u dheer qaadata baadhitaanka. Hadday taasi dhacdo, IOM ayaa kuu diyaarin doonta kaana bixin doonta hudheel aad seexato aroornimada danbena kugu wareejin doonta diyaarad kale oo ku geysa meeshii ugu danbaysay eed ku socotay.

Ka hor intaanad iman Carriga Maraykanka

Markaad gaadho meeshaad u socotay, waxaa maddaaarka kaaga hor iman doona qof qaraabadada ah, amma saaxiib ammaba wakiil ka socda hay'adda dib-u-dejinta oo kugula kulmi doona barxadda bagaash-keenka. Haddi ay dhacdo in aad weydo qof meesha kugula kulma, fadlan la xidhiidh booliiska madaarka, waxaanay kugu caawin doonaan sidii aad ula xiriri lahayd qaraabadaada amma hay'addaada dib-u-dejinta.



Dalka Maraykanka dhexdiisa, Dawladdu waxay kala shaqaysaa hay'daha dib-u-dejinta sidii dib loogu dejin lahaa qaxootiga. Dawladda ayaa dejisa sharciga iyo tilmaamaha lagu maamulayo, maal-gelisana adeegyada daruuriga ah ee ay qaxootigu u baahanyihiin; hay'adda dib-u-dejintu waxay adeegyadaas gaadhsiisaa qaxootiga, waxaana laga yaabaa inay bixiso mucaawano dheeraad ah.

Hay'adda dib-u-dejintu waxay noqon kartaa urur ku salaysan diin gaar ah, urur gaar loo leeyahay, hay'ad ka tirsan dawladda amma urur ka kooban jinsiyad gaar ah. In kastoo hay'adaha dib-u-dejinta qaarkood ay ku xidhanyihiin diimo gaar ah, haddana adiga lagaagama baahna inaad ka qayb-qaadato hawlahooda diiniga ah, hay'adaha dib-u-dejintana looma oggola inay ku dhiirrigeliyaan qaxootiga inay ku biiraan urur diimeed.

Hay'addaada dib-u-dejintu waxay xafiis ku leedahay magaalada aad degi doonto amma meel u dhow oo ay joogaan shaqaale hay'adda ka tirsan oo diyaar u ah inay ku caawiyaan. Haddii ay qaraabadaada, oo mararka qaarkood lagu magacaabo "qaraabada baroosinka kuu ah" ay ku noolyihiin magaalada, waxaa laga yaabaa inay gacan kugu siiyaan degitaankaaga. Hay'adaha qaar waxay leeyihiin shaqaale tabaruc ahaan kuu caawin doona markaad soo degtid.

Bilaabidda Hawlaha Degitaanka

Isla markaad dalka Maraykanka soo cago dhigataba, waxaa guri aad gasho kuula diyaar noqon doonta hay'adda dib-u-dejinta. Waxaa suurtagal ah in gurigu noqdo mid aad ku noolaan doonto muddo dheer oo cimaarad (abbaarmanti) kamid ah. Waxa kaluu noqon karaa guri ku meel-gaadh ah ooy iska leeyihiin qooyis kuugu tabarrucay inaad la deganaato muddo gaaban. Ammaba wuxuu noqon karaa guriga qaraabadaada amma hudheel. Haddii lagu dejiyo meel ku meel-gaadh ah, hay'addaada ayaa kugu caawin doonta sidii aad guri rasmi ah dhakhso ugu heli lahayd.



Sonddonka maalmood ee kuugu horraysa markaad timaaddo Maraykanka, waxaa kharashkaaga daruuriga oo dhan kaa bixin doonta hay'adda dib-u-dejinta. Hay'adaha qaarkood si toos ah ayay kharashka kaaga bixin doonaan ayagoo siinaya cidda kuu adeegtay. Qaarkoodna adiga ayay lacagta ku siin doonaan amma waxay kuugu dhiibi doonaan qaarabadaada si aad kharashkaaga adigu iskaga bixiso.

Dhexgalka Hawlaha Degitaanka

Kadib markaad timaaddo Maraykan, saddexda bilood ee kuugu horraysa, waxaa taageero ku siin doona shaqaalaha hay'addaada oo ay caawinayaan dadka qaraabadaada ah, saaxiibadaada, iyo dad tabarruc ah sidii aad u baran lahayd degaankaaga cusub. Ayagoo kugu garab gelaya, waxaad fulin doontaa waxyaalahan soo socda oo ah inaad:

- Hesho guri aad rasmi ahaan ugu noolaato
- Hesho dhar iyo alaab guri
- Ogaato in laguu keeni karo xubnaha qooyksaag ah ee dibedda kaaga maqan.
- Hesho kaadhka badbaadada bulshada (sooshal sakuuriti) oo la'aantiis aanad shaqo heli Karin.
- Raadsato shaqo
- Carruurtaada ku qorto iskuul
- Kala barato lacagta Maraykanka iyo maamulkeeda
- Barato sida loo isticmaalo gaadiidka dadweynaha

- Diyaarsato sidii aad u heli lahayd baadhis caafimaad iyo daryeelka daruuriga ah ee caafimaadka
- Raadsato kalaasyo aad ku barato afka Ingiriisiga
- Bilawdo sidaan wax uga ogaan lahayd dhaqanka Maraykanka iyo sharciyadiisa.
- Barato adeegyada loogu talo-galay bulshada ee degaankaaga ee ad ka faa-iidaysan karto



Waxaad u bahaantahay inaad si fiican uga faa-iidaysato hay'addaada dib-u-dejinta, waayo adeegyadaasi waxay hay'addu bixisaa keliya 90-ka maalmood ee kuugu horreeya kadib markaad timaaddo Maraykanka. 90-ka maalmood ee ugu horreeya ka dib, adeegyada jiraa waxay ku xidhanyihiin baahidaada shakhsiga ah iyo hay'addaada dib-u-dejinta qorshaheeda. Waxa dhici karta in lagu tilmaamo hay'ado kale si lagaaga haqab tiro baahi gaar ah.

Hay'adda dib-u-dejintu kaa bixin mayso karashyadaada (biilasha) iyo qaantaada. Waxaa waajib kugu ah inaad shaqaysato si aad u hesho lacag aad ku bixiso kharashyadaada.

Shaqaalaha hay'addaada dib-u-dejintu waxay si fiican kuu caawin karaan markaad si wacan ula shaqaysid. La socodsii hadba halkay wax kuu marayaan, daacadna ka ahaw waxaad ka filayso (higsanayso) iyo waxaad tabanaysidba, iskuna day inaad noqotid qof jajaban oo lala shaqayn karo.

U guuritaanka Magaalo Kale

Haddaad ka fikirayso inaad u guurto degaan kale, xasuusnoow inaanay hay'adda dib-u-dejintu mas'uul ka ahayn inay ku rarto. Sidoo kale, hay'adda dib-u-dejinta ee meeshaad u guuraysaana kuma khasbana inay ku caawiso. Haddaad go'aansato inaad guurto, adiga ayaa mas'uul iska noqon doona isna caawin doona. Haddaad qabto su'aal ku saabsan guuritaanka, kala hadal shaqaalaha hay'adda dib-u-dejinta.




Hay'adda dib-u-dejintaada waxa soo raaca hay'ado kale oo degaankaaga ka fuliya adeegyo bulsheed. Qaar kamid ahi waxay hoos yimaadaan maamulka dawladda hoose ee degmada iyo gobolada, amma maamulka dawladda dhexe. Qaarkoodna waa ururro tabarruc ahaaneed sida kuwa gacan saarka la leh kiniisadaha, masaajiddada iyo macbadyada Yahuudda, kuwaasoo lagu magacaabo ururrada adeegyada bulshada amma degaanka.

Qaxootigu waxay xaq u leeyihiin inay helaan adeegyo bulsheed, sida kaalmo lacageed iyo kala talinta dhinaca shaqo helidda, laakiin adeegyadaasi jiritaankoodu waxay ku xidhantahay hadba meeshaad joogtid. Hay'addaada dib-u-dejinta ayaa kaa caawin doonta inaad kala baratid adeegyada ka jira degaankaaga, kuuna sheegi doonta inaad xaq u leedahay iyo in kale iyo sida loo dalbado adeegyada.

Ururrada adeegyada bulsheed waxay bixiyaan kaalmo ku meel-gaadh ah si ay kuugu suurto gasho inaad isku filaato. Ururrada adeegyada waxay go'aamiyaan baahidaada ayagoo qiimaynaya lacagta kusoo gasha, meeshaad deganatahay, da'daada iyo waxyaalo kale. Markay xaaladdaadu wanaagsanaato, hay'addu waxay dhimi adeegyada ay kuu qabato amma way joojin adeegyada. Haddiise ay xaaladdaadu noqoto mid sii adkaata, waxa laga yaabaa inaad xaq u yeelato adeegyada mar labaad ooy muddo kusii socdaan. Waxa lagama maarmaan ah (muhiim ah) inaad xasuusnaato in adeegyadaasi yihiin kuwo ku meel-gaadh ah; waxay kuu socdaan keliya ilaa intaad isku filaanayso.

Adeegyada degaanka waxa kamid ah kaalmada gaarka ah, kaalmada dawladda iyo adeegyada dadweynaha.



Kaalmada Gaarka Ah

Ururrada kaalmada gaarka ahi waxay bixiyaan adeegyo kala gedisan (nooc-nooc ah). Adeeyadaasi inta ay dhanyihiin iyo noocoodu waxay ku xidhantahay hadba meesha la joogo, laakiinse degaamo badan ayaa bixiya adeegyada hoos ku taxan:

- Talo iyo tilmaan-siinta
- Hagaajinta sharcigaaga amigreeshinka
- Barashada (dhigashada) afka Ingiriisiga luqad-labaad ahaan (ESL)
- Kaalmada shaqo raadiska iyo xirfad barashada
- Adeegga tarjumaadda luqadaha

Urur kamid ah ururrada kaalmada gaarka ah, oo laga helo degaamo badani, waa ururka loo yaqaan MAA (Mutual Assistance Association). Ururradaasi waxa assaasay dad qaxooti ahaan jiray iyo dad imigaranti ah

oo ujeedadoodu tahay inay caawiyaan qaxootiga ku cusub degaankooda. Matalan, waxa laga yaabaa in ururka MAA uu siiyo qaxootiga iyo imigarantiga cusub adeegyada ay kamidka yihiin: baraarujin xagga degaanka ah, turjumaadda afka (luqadda), kaalmada dhinaca shaqo raadiska, barashada sida loo raaco gaadiidka dadweynaha, iyo kalaasyo lagu barto afka Ingiriisiga

Sidoo kale, waxa dhici karta in ururada diiniga ah sida kiniisadaha, masaajiddada iyo macbadyada Yahuuddu ay bixiyaan adeegyo kala duduwan. Qaarkood waxay bixiyaan kalaasyo dadka waaweyn lagu baro afka Ingiriisiga luqad-labaad ahaan (ESL), amma waxay casharro siyaan carruurta galinka dambe saacadaha iskuulka dabadeed, qaarna waxay qaybiyaan dhar duug ah iyo alaabta guryaha, qaar kalena waxay waayeelka u diyaariyaan barnaamijyo.

Kaalmada Dawladda

Hay'adaha dawladda ee adeegga bulshadu waxay siiyaan dadweynaha degaanka adeegyo kala duduwan. Waxay caawiyaan dadka qaba baahi gaar ah, sida qooyasaska dan-yarta ah, dadka bilaa hoy'ga ah, iyo dadka kala dhantaalan (sida naafada oo kale). Dadka qaxootiga ahi waxay xaq u leeyihiin inay ka qay-qaataan mashruucyo dhawr ah oo ay dawladdu kaalmo ahaan u bixiso. Mashruucyadaas waxaa caadiyan fuliya xafiiska dawladda ugu qaabilsan adeegyada bulshada, laakiinse waxaa kaloo mashruucyadaas fulin kara ururro gaar loo leeyahay iyo ururro tabarruc ahaaneed oo ay kamid tahay hay'adda dib-u-dejintu.

Mashaariicda kaalmada dadweynaha ee dawladdu waxay leeyihiin waqti xaddidan (go'an) iyo tilmaamo ka qaybgal oon leex-leexad lahayn. Si looga qayb-galo mashruuca, waa in arjiile (codsade) kastaaba buuxiyo foomam (waraaqo) caddaynaya lacagta soo gasha (dakhligiisa) iyo macluumaad kale oo la xidhiidha naftiisa. Hay'ddaada dib-u-dejinta ayaa gacan kugu siin karta sidii aad u heli lahayd war ku saabsan mashaariicdaas, kuuna sheegi karta inaad xaq u leedahay iyo in kale iyo sidii aad u dalban (codsan) lahayd.



Mashaariicda dawladda ee caawiya qaxootigu waa kuwan so socda:

Mashaariicda kaalmada lacag ahaaneed. Dadka dhibaato kala kulma inay shaqo helaan, waxa kaalmo lacageed siiya laba mashruuc. Mashruuca koowaad oo ah kaalmada ku-meel-gaadhka ah, marka la soo gaabiyana loo yaqaan TNF waxa loogu talo-galay qoosaska baahan ee carruurta haysta, iyo mashruuca labaad oo ah kaalmada lacag ahaaneed, marka lasoo gaabiyana loo yaqaan RCA oo loogu talo-galay qaxootiga keli-socodka ah iyo xaasaska aan carruurta lahayn. Mashaariicdaas waxa degmooyinka looga yaqaan magacyo kala duwan waxaana laga yaabaa inay siyaabo ku kala duwanaadaan degaan ka degaan. Si ay xaq ugu yeeshaan kaalmo lacag ahaaneed, ka qayb galayaasha mashruucu waa inay ku jiraan tababar shaqo amma ay soo caddeeyaan inay shaqo raadsanayaan. Kaalmada lacag ahaaneed waxay waartaa dhawr bilood oo keli ah.

Mashruuca deeq-ugu-darka (kaabidda). Hay'addo badan oo kamid ah kuwa dib-u-dejinta ayaa bixiya mashruucan halkay lacag kaash ah ka siin lahaayeen qaxootiga doorta inay shaqaystaan laakiin u baahan inay helaan taageero dhaqaale marka hore. Qaxootiga mashruucan ka qay-galaa waxay ku ballan qaadaan inay shaqo u helaan sida ugu dhakhsaha badan. Abalgud ahaan,

ka-qayb-galayaasha mashruucu waxay, afarta bilood ee Maraykan ugu horraysa, heelaan korodhsiimo kaalmo lacageed, talo-siin iyo adeegyada meelaynta.

Kaadhadhka (tikidhada) Raashinka (Food Stamps).

Mashruucan waxaa bixisa dawladda federaalka ee Maraykanka waxaana loogu talo-galay dadka dan-yarta ah ee ku nool Maraykanka. Qaxootigu waxay ka dalban karaan kaadhadhka raashinka xafiis kamid ah xafiisyada dawladda hoose ee degmooyinka iyo gobolada. Mugga kaalmada raashinka ahi wuxuu ku salaysanyahay qooyo walba tiradiisa iyo lacagta soo gasha. Kaadhka raashinku waa kaadh caag ah waxana lagu iibsana karaa wixii raashin ah oo keliya. Waxyaabaha aan cuntada ahayn sida sigaarka, dhiriq-dhawrka carruurta (dhaaybar), buugaagta iyo saabuunta laguma iibsana karo kaadhadhka raashinka.

Waxa kaloo jira mashruuc ay dawladda dhexe bixiso oo lagu magacaabo Dumarka, Ilmaha iyo Carruurta, marka lasoo gaabiyana loo yaqaan WIC oo loogu talo-galay haweenka uurka leh, kuwa ummusha ah amma isasita iyo carruurta da'doodu tahay ilaa 5 jir. Mashruuca WIC wuxuu bixiyaa raashin kaabid ah iyo casharro ku saabsan caafimaadka.

Dakhliga Badbaadada Bulshada (SSI).

Mashruucani waa kaalmo ay bixiso dawladda federaalku (dawladda dhexe) oo loogu talo-galay dadka indhaha la', kuwa naafada ah iyo waayeelka da'doodu ka weyntahay 65 jir. Qaxootiga loo ogolyahay ka qayb-galka mashruucan waxay ka dalban karaan xafiiska degmadooda ee badbaadada bulshada (xafiiska soosha sakuuritiga). Waa isla xafiiska laga samaysto kaadhka badbaadada bulshada (soosha sakuuritiga).

Kaalmada Dhinaca Dabka (tamarta) Guryaha.

Waa mashruuc ay bixiso dawladda federaalku (dhexe) oo dan-yarta ka caawiya bixinta biilasha (kharashyada) kulaylinta, iyo qaboojinta guryaha. Dadka qaxootiga ah waxa loo ogolyahay inay taageerada dabka ka codsadaan xafiiska dawladda hoose ee degaankooda. Mashruucani maaha mid ka jira meel kasta.

Mashruuca Xannaanada Carruurta. Degaanada qaarkood waxaa laga helaa xannaanada maalinimo ee carruurta oo bilaash ah amma lagu heli karo qiimo jaban oo loogu talo-galay dadka danyarta ah. Mashaariicdan waxa badanaaba maalgelisa dawladda federaalka waxaana fuliya xafiisyada dawladdaha hoose amma xarumaha, sida xarumaha xannaanada maalmeed. Waalidiinta u baahan in loo hayo ubadkooda maalintii si ay u shaqeeyaan amma shaqo u raadsadaan, waxa loo ogolyahay inay ka qayb galaan mashruucan.

Adeegyada Dadweynaha

Degaan walba wuxuu leeyahay adeegyo dadweyne oo loo ogolyahay xubnaha bulshada oo dhan. Ka war-qabidda adeegyadaasi waxay kugu caawin doontaa inaad ka faa-iidaysato waxyaalaha jira, lana qabsato nololsha Maraykanka. Waa kuwan qaar kamid ah adeegyada dadweynaha kuwa ugu muhiimsan:

Ciidamada Booliiska. Ciidamada boliisku waxay dhaqan geliyaan sharciga waxaanay sugaan nabadgelyada dadweynaha. Waxay u gurmadaan shilalka si ay u gudtaan gargaar degdeg ah oo caafimaad. Waxay caawiyaan dadka ka lumay (ambaday) meeshay u socdeen, waxaanay mar walba ku dhex jiraan xaafadaha magaalada si ay u wanaajiyaan cilaaqaadka bulshada. Waxaad mar walba arkaysaa booliis gaaf wareegaya dariiqyada xaafadaha ayagoo lugaynaya amma baabuur wata. Boolisku waxay kaa mudanyihiin maamuus iyo ixtiraam gaar ah. Hadduu kugu soo dhaqaaqo oo uu kugu amro inaad istaagto, isla markiiba amarkiisa qaado oo istaag. Haddaad cararto waxa loo qaadan karaa inaad wax xun samaysay, waxaanay kuu horseedi kartaa dhibaato kasii weyn. Weligaa ha isku deyin inaad booliiska laaluush (lacag) siiso. Laaluushku waa danbi kuu keeni kara ciqaab culus. Haddaad af-garan waydo booliiska, waa inaad codsataa turjumaan amma aad la xidhiidhaa hay'addaada dib-u-dejinta.

Hawlaha Gargaarka Degdegga ah. Degaamada oo dhamai waxay leeyihiin cutubyada (waaaxaha) dab-damiska iyo gargaarka

caafimaadka degdegga ah. Si aad u hesho gargaar degdeg ah markay wax dhacaan, waa inaad wacdaa (garaacdaa) tilifoonka (taleefonka) lambarkiisu yahay 911. Waxaa kuu jawaabi doona “obareytar”. Waa inaad obareytarka u sheegtaa waxaad u baahantahay oo noqon karta booliis, amma dab-damis amma ambalaas iyo meeshaad joogto. Haddaad af Ingiriisi ku sheegi kari weydo dhibaatada ku haysata, waxa kugu filan inaad tidhaahdo oo keliya, “Help”, “Emergency”, hana isa saarin tilifoonka waayo laynka tilifoonka furan ayuu obareytarku ku garan karaa meeshaad joogto.

Laaybereeriga (Maktabadda wax-akhriska). Degaamo badan ayaa laga helaa laaybereeriyada dadweynaha oo ay yaallaan buugaag, joornaallo iyo macluumaad ku saabsaan degaanka. Laaybereeriyada badankoodu waxay leeyihiin qayb iyo hawlo gaar u ah carruurta. Haddaad haysato kaadhka aqoonsiga laaybereeriga, waxaad laaybereeriga ka amaahan kartaa buugaag aad haysan karto dhawr usbuuc. Waa inaad buugaagta kusoo celisaa waqtiga lagaa rabo amma waa inaad bixisaa lacag ganaax ah hadday kugu dhaafto waqtigii lagu qabtay.

Garoomada dalxiiska (seeraha tamashlaha). Degaan kasta waxa laga helaa garoomo cayaareed, seerayaal lagu dalxiiso, iyo meelo loo raaxaysi tago. Waaxda degaankaaga ugu qaabilsan hawlaha dalxiiska iyo cayaaraha ayaa laga yaabaa inay qaban-qaabiso cayaaro iyo cadda-loolyo loogu talo-galay carruurta, dhalinyarada iyo waayeelka oo lacag la’aan ah amma lagu heli karo qiimo jaban. Sidoo kale, waxa jira garoomada dalxiiska iyo seerayaasha tamashlaha qaranka iyo gobolada oo lagu oggolyahay inaad ku raaxaysato. Waxaad ku dalxiisi kartaa buuraha, kaymaha, webiyada, harooyinka iyo xeebaha quruxda badan. Garoomada ciyaaraha iyo seerayaasha dalxiiska qaarkood waxa u dhigan sharci xaddidaya hawlaha iyo cayaaraha lagu qabsan karo. Qaarkood waa bilaash (lacag la’aan), qaarkoodna waxa lagu galaa lacag.

Macluumaadka ku saabsan adeegyo kale oo dadweyne waxaad ka heli doontaan qodobada soo socda ee ku saabsan wax-barashada iyo caafi-maadka.



Isla markaad qaxooti ahaan ku timaaddo dalka Maraykanka, waxa guri goglan oo qalabaysan kuula diyaar ah hay'addaada dib-u-dejinta. Waxaa laga yaabaa in marka hore lagula dejiyo dad qaraabadaada ah oo dalka kaaga soo horreeyay ammaba dad kuugu tabarrucay inaad la joogto. Haddii kale, waxaa dhici karta in lagu dejiyo guri kiro ah amma hudheel, ammaba waxaa lagu geyn karaa xarunta soo dhaweynta hay'adda. Haddaad tahay keli-socod, waxa laga yaabaa in ku meel-gaadh ahaan lagula dejiyo qaxooti kale oo keli-socod ah.

Waxa waajib ku ah hay'adda dib-u-dejinta inay hubiso inaad haysato guri aad degtid bisha kuugu horraysa Maraykanka. Haddaad xigto ku leedahay dalka, waxa laga yaabaa in ayaga lagu waydiiyo inay ku meel-gaadh ahaan meel kuu siiyaan.

Raadinta Guriga Rasmiga ah

Shaqaalaha hay'adda dib-u-dejinta ayaa isla markaad timaadaba kaala hadli doona guri aad rasmi ahaan ugu noolaato. Waxa laga yaabaa in raadinta gurigaaga rasmiga ahi qaadato dhawr usbuuc, waayo waxa adkaan karta in la helo meel fiican oo lagu noolaan karo. Waxa laga yaabaa inaad doonto inaad hesho meel kiro jaban, aamin ah, u dhaw tukaamada, u dhaw gaadiidka dadweynaha, una dhaw meeshaad ka shaqaysid iyo iskuulka carruurtaadu dhigato.

Si aad ku hesho guri, waxaad samayn kartaa waxyaalahan:

- La tasho shaqaalaha hay'addaada
- La tasho qaraabadaada iyo Asxaabtaada
- Warayso dadkaad wada shaqaysaan
- Eeg boodhadka “iidhe”-da iyo xayasiiska guryaha
- Eeg joornaalada qaybtooda xayaysiiska kirada guryaha
- Akhriso jariidadaha gaarka ah ee lagu xayaysiiyo kirada guryaha
- Booqo xafiisyada kirada guryaha ee cimaaradaha (abbaarmanti)
- Intarnetka ka baadh guryaha kirada loo doonayo.



Noocyada Guryaha

Degaamada Maraykanka badankoodu waxay leeyihiin dhawr nooc oo guryo ah:

- Guryo cimaarad (abbaarmanti) ah oo la wada deganyahay
- Guryo loogu talo-galay hal faamily (qooyo)
- Guryaha baabuurta lagu jiiido
- Qol ku dhex yaal guri amma cimaarad

Guryaha laga kiraysto cimaaraduhu waxay badanaaba ka koobanyihiin: madbakh uu qalabkiisu u dhanyahay (girgiraha cunto-kariska, talaajad, iyo mashiinka weelka dhaqa), qolka fadhiga iyo ka cuntada; hal qol amma in ka badan oo la seexdo, suuli (musqul) iyo maqsinno yaryar oo wax lagu kaydsado. Guriga ugu yar ee laga kiraysan karo cimaarad (abbaarmanti) oo lagu magacaabo “studio” waa hal qol oo ka kooban meel la seexdo, meel wax lagu cuno iyo suuli (musqul).



Qiimaha guryaha iyo nabadgelyada

Qiimaha guryuhu way kala duwanyihiin, gobol ka gobol, magaalo ka magaalo iyo xataa degaamada isku dhowdhow. Hase yeeshee, meel kastood ku noolaato, kirada ayaa noqon doonta qaybta ugu weyn ee kharashkaaga bil ahaaneed.

Guryaha cimaaradaha eed kiradooda awoodi kartaa waxay ku yaallaan xaafadaha dadka dan-yarta ah, meelahaana badanaaba waxa aad ugu badan danbiyada. Adoon u eegayn meeshaad degantahay, mar walba gurigaaga quful dhag ku sii markaad ka baxayso, waana inaad taqaannaa xaafadaha iyo degaanada ay tahay inaad iska ilaaliso tegitaankooda habeenkii. Waa inaad barataa saraakiisha booliiska ee degaankaaga si aad ugala xaajooto arrimaha ku saabsan ka hortagga danbiyada ka dhaca degaankaaga.

Waa inaad ku talagashaa inaad ku noolaato xaafad ay si badhax ah u wada deganyihiin dad kala jinsiyad iyo dhaqan ah. Waxaaba laga yaabaa in jiraankaagu ay u kala dhasheen wadamo kala duwan iyo dhaqamo kala jaadjaad ah.



“ Annaga wuxuu noo abaa guri (abaarmanti) qurux badan, oo ay ka buuxaan waxyaalo aannaan weligeen arag.



... Maanta waxaan ogahay in dadka xaafaddan ku nool ay yihiin dad aad dan yar u ah. Abaarmantiyaashu way yar yar yihiin, hab afar-geesood ahna way u koobanyihiin.



Hase yeeshe wadajir, aniga iyo carrurtaydu, waxaan darbiyada abaarmanitga nadiifinnay illa iyo inta ay ku dhalaalan iftiinka yar ee qorraxda, waxaan ku kifaaxnay raaxada gurigayaga cusub. ”

Heshiisyada iyo Sharciyada Kirada Guryaha

Markaad guri kiraysanayso, waa inaad saxiixdaa heshiiska kirada. Heshiiska kiradu waa warqad sharci ah oo ilaalisa xuquuqda qofka guriga kiraysanaya (kiraystaha) iyo mulkiilaha guriga, labadoodaba. Heshiiska wuxuu kaa ilaaliyaa in mulkiilaha gurigu si xun kuula macaamilo.

Heshiiska kiradu wuxuu caddeeyaa qiimaha kirada qolka/qolalka cimaaradda amma guriga ee bil walba lagaa doonayo. Waxa laga yaabaa inay kiradu ka koobantahay qiimaha dabka guriga, gaaska amma saliidda kululeeyaha, biyaha iyo qahin-gurka, amma kirada gooni lagu xisaabiyo. Intaanad saxeexin heshiiska kirada, iska hubi in kharashyada kale kamid yihiin kirada iyo in kale.

Markaad saxeexdo heshiiska kirada waxaad aqbashay waxyaalahan soo socda:

- Tirada dadka guriga loo ogolyahay inay galaan
- Kirada bishii lagaa rabaa intay tahay
- Maalinta bisha ee lagaa doonayo inaad bixiso kirada
- Ilaalinta xaaladda guriga (inuu ahaado nadiif, waxyeelana laga dhawro).
- Tirada bilaha (muddada) aad ku jiri doonto guriga (badaanaba 12 bilood)
- Shuruudaha guriga lagaga bixi karo ayadoon muddada heshiisku dhammaan.

Waxa laga yaabaa in lagugu xidho inaad soo caddayso inaad kirada iska bixin karayso iyo in kale. Haddii aanad shaqaynin, ma lihid raad-raac qaan-bixineed ood caddayn u ah inaad tahay qof aamin ah oo biilasha iyo deynta iska bixin jiray.

Sababtaa darteed, waxa laga yaabaa in loo baahdo inaad keento qof kaa wakiil noqda oo kula saxeexa heshiiska. Qofkaasi waa inuu noqdaa qof aamin ah oo leh raad-raac qaan-bixin wanaagsan.

Kiraystayaasha guryaha waxa badanaaba laga rabaa inay bixiyaan lacag deebaaji ah markay saxeexaan heshiiska. Lacagta deebaajiga ahi waxay la qiimo tahay hal bil kiradeed waxaana lagu soo celin doona markaad guriga ka baxdo haddii aad fulisay dhammaan shuruudihii heshiiska.

Haddaad jebiso shuruudaha heshiiska kirada, guriga waa lagaa saari karaa, haddii lagaa saarana, waxaad luminaysaa lacagtaadii deebaajiga ahayd. Matalan, gobolada iyo magaalooyinku waxay leeyihiin sharcio xadeeya tirada dadka loo ogolyahay inay guriga galaan oo ku xidhan hadba inta qol-jiif ee uu gurigaasi leeyahay. Haddaad leedahay qooyo ka kooban dad badan, waxa laga yaabaa in aanad heli karin guri kugu filan ood u baahato inaad kiraysato guryo dhawr ah. Hay'addaada dib-u-dejinta ayaa samayn doonta wax alla wixii karaankeeda ah si ay kuugu hesho laba guri amma in ka badan oo isku dhaw. Haddaad guriga soo geliso tiro ka badan inta sharcigu kuu ogolyahay, guriga waa lagaa saari karaa.

Sharciga kirada guryuhu way qabtaan kireeyaha iyo kiraystaha labadoodaba. Kireeyaha oo looga jeedo qofka guriga iska leh, waxa laga rabaa in guryihiisu noqdaan kuwo buuxiya heerka nabadgelyada iyo nadaafadda ay dawladdu ka rabto. Waa in mulkiilayaasha guryuhu hubiyaan in dab-gelinta, habka biyo-gelinta iyo habka kululaynta gurigu ay waafaqsanyihiin sharciga, waana inay guryaha ku sameeyaan aaladda urisa qiinqa (qaaca), kalana dagaalamaan baranbarada iyo xasharaadka. Sidoo kale, sharciyada guryuhu waxay jideeyaan in mulkiilayaasha guryuhu aanay qofna guri ugu diidi karin sababo la xidhiidha jinsiyadiisa, diintiisa iyo dalkii uu ka yimid toona.



Marka kuugu horraysa eed timaaddo Maraykanka, waxa waqti badani kaaga lumi doonaa inaad kolba meeshay dani kaa gasho u lugayso. Dabadeedna, si dhakhso ah ayaad u bilaabi doontaa sida loo isticmaalo gaadiidka dadweynaha; maalin maalmaha kamid ahna waxa laga yaabaa inaad wadato baabuur aad adigu iska leedahay.

Markaad Maraykanka timaaddaba, isku day inaad barato calaamadaha, signalada (samaafaraha) traafikada iyo sharciyada waddooyinka gaadiidka. Sidaa waxa kuu hawl yaraan doonta istimaalka gaadiidka dadweynaha iyo barashada sida loo wado baabuurka.

Gaadiidka Dadweynaha

Degaamada Maraykanka waxaa laga helaa gaadiid dadweyne oo kala duduwan. Gaadiidka magaalooyinku wuxuu ka koobnaan karaa basas, metroo (subway) iyo tareenno dadka shaqo geeya ooy dadku magaalada ku dhex gooshi karaan haddaanay baabuur haysan. Waxa kaloo la isticmaali karaa takaasida inkastooy badanaaba qaali yihiin. Meelaha qaarkood, si fiican loogama helo gaadiidka dadweynaha. Hay'addaada dib-u-dejinta ayaad ka heli kartaa macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan gaadiidka dadweynaha ee degaankaaga isla markaad Maraykanka soo gasho.

Baabuur yeelashada iyo wadiddiisa

Meelaha aan lahayn gaadiidka dadweynaha amma aan isticmaalkiisu fududayn, waxa laga yaabaa inaad jeclaysato in baabuur aad iska leedahay degdeg u hesho. Baabuur yeelashadu way fiicantahay laakiinse waa qaali. Midda kale, baabuur yeelashada Maraykanka dhexdiisa iyo wadiddiisu waxay la timaaddaa xilal farabadan oo dusha kaa fuula.

Sharciyada xukuma baabuur yeelashada iyo baabuur wadidda waxaa dejiya dawladda gobolada. Hay'addaada dib-u-dejinta ayaa ku sheegi doonta sharciyada gobolkaad ku nooshahay, kuna siin doonta macluumaadka ku saabsan meeshaad ka helayso liisanka baabuurta si aad baabuur wadidda ugu barato Maraykanka dhexdiisa.

Si aad si sharciga waafaqsan ugu wadato baabuur, waa inaad liisanka wadidda ka haysato gobolkaad joogto, badalkiisana uma istimaali kartid liisan caalami ah ood haysato. Haddaad baabuur waddo bilaa liisan, waxa dhici karta in lagu ganaaxo amma lagu xidho. Si aad baabuur u waddo, waa inaad gaadhay da'da sharcigu ogolyahay, taasoo kala duwan gobol ka gobol.

Si aad u qaadato liisan, waa inaad tagto xafiiska Waaxda Baabuurta degaankaaga ee loo yaqaan DMV, kuna najaxdaa imtixaanada: aragga, qoraalka, sharciyada wadidda iyo tijaabada wadidda; bixisaana lacag fii (gunno) ah. Liisanka waxa ku yaal sawirkaaga, magacaaga, cinwaankaaga iyo taariikhda aad dhalatay, waxaana la cusboonaysiiyaa dhowrkii sanaba mar.


Haddaad jebiso qaar kamid ah sharciyada wadidda, waxaa laga yaabaa in lagaala noqdo liisanka. Tusaale ahaan, haddii lagu qabto adigoo sakhraansan oo baabuur wada, laga yaaabaa in liisanka lagaa qaaado, amma aad bixiso ganaax culus, amma lagu xidho. Xataa waxa suurtagal ah in dalkaagii lagu mustaafuriyo.

Kadib markaad iibsato baabuur, waa inaad ka diiwaan-gelisaa Waaxda Baabuurta (DMV), lana hubiyaa inaanu lahayn cilado keeni kara nabadgelyo darro (shil). Waa inaad baabuurka gelisaa caymis. Caymiska baabuurta waxa laga iibsan karaa shirkado caymis ah oo gaar loo leeyahay. Qiimaha caymisku wuxuu ku xidhanyahay hadba meeshaad ku nooshahay, da'daada, inta qof ee ku qoran inay baabuurka wadaan iyo raad-raaca (rikoodhka) baabuur wadidda ee kaa yaal DMV-da. Waxa kalood u baahantahay inaad ku xisaabtanto kharashka kaaga bixi doona shidaalka, xannaanada iyo meeshaad baabuurka dhigan lahayd.

Waqooyiga Ameerika



New York	→ Los Angeles	(2,911 Miles/4,684 Kilometers)
New York	→ Chicago	(818 Miles/1,316 Kilometers)
New York	→ Miami	(1,325 Miles/2,132 Kilometers)



Shaqaalaynta

Dadka Marayakanka badidoodu waxay ahmiyad aad u weyn siiyaan isku-fillaanshaha dhinaca dhaqaalaha. Waxay rumaysanyiin in dadka waaweyni shaqaystaan si ay lafahooda iyo qoowsaskooda u siiyaan taageero dhaqaale, oo aanay ku tiirsanaan mucaawanada dawladda. Sababtaas awgeed, shaqo-raadisku waa waxa ugu horreeya ee ugu muhiimsan ee laga rabo inay ku dhaqaaqaan dadka qaxootiga ahi bilaha ugu horreeya kadib markay soo galaan Maraykanka. Yoolkaaga kowaad waa inuu noqdaa sidaad ku heli lahayd shaqo.

Bilawga hore, waxa lagaa filayaa inaad aqbasho shaqada kuugu horraysa ee lagu siiyo, xataa hadday mid aan lacag badnayn, amma aanay ahayn waxaad horray u qaban jirtay. Dadka Maraykanka badidoodu waxay rumaysanyihiin in shaqo kastood qabataa ka ficantahay shaqo la'aanta .

Dawladd iyo hay'addaadu toona ma dammaanad qaadaan (garantii kuguma siiyaan) inaad shaqo hesho. Xafiiska qaxootiga u qaabilsan shaqada ayaa kugu caawin doona shaqo raadiskaaga, laakiin ma heli doontid shaqo haddaanad adigu ku dadaalin inaad heshooto. Shaqo kastoo bannaanaata waxaad kula tartami doontaa dad kale oo ayaguna shaqo raadis ah, sidaa daraadeed, waa inay kaa muuqato inaad diyaar u tahay inaad shaqaysato.

Noocayada Shaqooyinka

Waxaa jira saddex nooc oo ah shaqooyin guud oo dalka Maraykanka gudahiisa lagaga shaqaysto: shaqooyinka aan xirfadda u baahnayn, shaqooyinka xirfadda u baahan, iyo shaqooyinka borofishanka ah. Qof kasta oo doona inuu ka shaqaysto nooc kamid ah noocyada shaqooyinka, waxa looga baahanyahay inuu leeyahay heer aqooneed amma waayo aragnimo gaar u ah shaqada iyada ah.

Shaqooyinka aan xirfadda u baahnayni

waa shaqooyinka laga bilaabo halka ugu hoosaysa, waana shaqo u baahan tababar iyo waayo-aragnimo yar. Tusaale ahaan waxaa kamid ah shaqooyinka ay

qabtaan dadka nadiifiya hudheelada, dadka ka shaqeeya makhaayadaha iyo dadka ka shaqeeya warshadaha. Shaqooyinkaasi badanaaba waxa mushahaarada lagu bixiyaa saacad ahaan, umana baahna Af- Ingiriisi heer sare ah. Qaxooti badan ayaa shaqooyinka noocaas ah qabta inta ay ka baranayaan af-Ingiriisiga iyo xirfado kale.

Shaqooyinka xirfadda u baahan waxaa laga rabaa shaqaaluhu inay shaqada u tababaran yihiin, Af-Ingiriisiga heer sare ka gaadheen, xirfad illaa heer ku siman u leeyihiin shaqadooda gaarka ah. Tusaale ahaan, shaqaalaha noocaas ah waxaa kamid ah: farsamo-yaqaanka (makaanigga) baabuurta, farsamo-yaqaanka dabka, farsamo-yaqaanka kombayutarka iyo farsamo-yaqaanka qurxinta (burukeeri). Shaqooyinka xirfadda u baahani waxay bixiyaan mushaar saacadle ah, amma usbuucle ah oo ka badan mushaharka ay qaataan dadka ka shaqeeya shaqooyinka aan xirfadda u baahnayn. Xataa waxa dhici karta in mushaharka shaqooyinka xirfaddu ka mushahar badanyihiin shaqooyinka borofishanka qaarkood. Shaqooyinka xirfadda u baahan badidooda waxaa loo qaataa liisan gaar ah, amma inaad xubin ka tahay urur u gaar ah shaqaalaha xirfadleeyda ah. Lagama yaabo in lagu ogo laado inaad ku shaqaysato liisankaad kala timid dalkaagii hooyo, laakiin markaad Af-Ingiriisiga si fiican u barato, waxaad qaadan kartaa koorso (koorso) si aad liisan ugu hesho Maraykanka.

Shaqooyinka borofishanka ah waxay badaanaba u baahanyihiin ugu yaraan shahaado jaamacadeed, aqoon sare oo Af-Ingiriisi ah, iyo xirfad heer sare ah ood ku leedahay shaqada iyada ah. Xirfadahan inaad heshaa waxay qaadataa waqti dheer. Shaqooyinka borofishanka ah badankooda, sida dhakhtarnimada iyo macalinimada, waxa iyagana looga baahanyahay in liisan amma shahaado gaar ah looga qaato gobolkaad ka shaqaysato. Xataa haddaad liisan kala timid dalkaagii hooyo, waxaa lagaa rabaa inaad wax-barasho dheeraad ah, imtixaan iyo shahaado cusub (certification) ka qaadata Maraykanka kahor intaanad ku shaqaysan khibraddaada. Shaqooyinka borofishanka ah badankooda waxaa lagu

qaataa mushahar biloodle ah, tasoo macnaheedu tahay, halkii laguugu xisaabin lahaa saacad ahaan, waxaad qaadanaaya mushahar go'an oo ku qorshaysan sannad buuxa.

Rag iyo Dumar Shaqo u Xaydan

Dalka Maraykanka, rag iyo dumarba waa la wada shaqeeyaa. Shaqaalaha Maraykanka 50% ayaa dumar ah, waxaanay qabtaan shaqooyin lamid ah kuwa raggu qabataan oo heer kasta gaadhsiisan, inta badanna ayagaaba madax u noqda shaqaale rag ah. Laga yaabaa in dalkaagii hooyo looga dhaqmo si ka gedisan oo aanad uba baran fikradda ah dumar dibad baxoobay oo shaqeeya. Hase ahaatee, faa-iido weyn ayaa ku jirta marka ay labada waalidba shaqeeyaan, eey laba meelood lacagi kaa soo gasho, taasoo qooyiska ku caawinaysa inay si dhakhso ah u gaadhaan horumar iyo isku-filaansho dhaqaale.

Shaqo Raadinta

Qorshahaaga gaarka ah iyo dadaalkaaga ayaa ah habka ugu fiican ee shaqo helid kuu horseedi kara. Hase ahaatee, waxa jira adeegyo kale oo kugu caawin kara dadaalkaaga shaqo raadinta.

Hay'adaha dib-u-dejinta iyo adeegga shaqo-raadinta ee qaxootiga.


Shaqaalaha dib-u-dejinta iyo hay'adda adeegga shaqaalaynta qaxootiga ayaa qaxooti badan ku caawiya inay helaan shaqadooda ugu horraysa ee Maraykanka dhexdiisa. Fikradahaaga la wadaag, talooyinkoodana si fiican u dhagayso. Waxay kugu caawin doonaan inaad fahamto nooca shaqo eed filan karto inaad ku hesho xirfadda iyo waayo-aragnimadaada.

Hay'adaha shaqaalaynta dadweynaha.

Gobol walba wuxuu leeyahay hay'ado dadweynaha ugu qaabilsan shaqaalaynta oo ku caawin kara lacag la'aan. Hay'daada dib-u-dejinta ayaa kuu sheegi karta meesha ay xafiisyadaasi ku yaallan.

Asxaabta iyo Qaraabada. Asxaabtaada,

qaraabadaada iyo xubno ka tirsan degaankaaga ee kaaga soo horreeyay Maraykanka ayaa kuu sheegi kara shaqooyinka ka bannaan meelaha ka shaqeeyaan iyo shaqooyinka kale ee ay yaqaanaan.



Waxaa lagaa doonayaa inaad caddayso inaad haysato ogolaanshaha shaqada. Qaxootiga badankoodu waxay isticmaalaan kaadhka I-94 (kaasoo ay Hay'adda CIS ku dhufatay shaabadda ogolaanshaha shaqada), Kaadhka badbaadada bulshada (SSC), Kaadhka aqoonsiga oo sawir leh (sida warqadda aqoonsiga shaqada (EAD), baasaaboort, ama liisanka wadaha baabuurta. Waa inaad mar walba oo waraysi shaqo laguugu yeedho sii qaadataa dokumen-tiyadaasi orijinaalkooda. Lama ogola footo-koobi.”



talooyin ah ee ku saabsan adeegyada xannaanada carruurta ee degaankaaga.

Tabaha loogu guulaysto waraysiga shaqada.

Mar haddaad shaqo codsato, waa in lagula yeeshaa waraysi shaqo (intarfiyuu). Qofka shaqaaleeyaha ah ayaa kuu sheegi doona shaqada aad qabanayso, kuna waraysan doona si uu u ogaado inaad tahay qof wanaagsan oo kasoo bixi kara shaqada. Si uu kaaga qaato fikrad fiican, isku day inaad fuliso waxyaalahan soo socda:

Ku imow saacadda lagu rabo. Dadka Maraykanku waxay siiyaan waqtiga ahmiyad weyn. Haddaad habsaanto, shaqaaleeyuhu wuxuu u qaadan doonaa inaad shaqadana ka habsaami doonto.

Nadaafadda ilaali soona labbiso dhar habboon. La-taliyahaaga shaqada ee hay'adda shaqaalaynta ayaa kugu caawin kara nooca iyo dharkaad soo xidhanayso.

Qofka madaxda ah ee waraysiga kula yeelanaya **gacan qaad** adigoo dhoola-caddaynaya, **toosna wajigiisa u eegaya.** Dadka Maraykanku waxay rumaysanyihiin qofkood toos wajigiisa u eegtaa waxay tusinaysaa inaad daacad tahay, dhoola-tuska iyo gacan-qaadkuna waxay muujiyaan inaad shaqo diyaar u tahay, laakiin wadamada qaarkood toos u eegidda wajiga ama il il-kudhufushada waxa looga arkaa inay tahay dhaqan xumo.

Su'aalo ka dhiibo waxaad qaban doonto. Taasi waxay qofka madaxda ah tusaysaa inaad shaqada niyad u hayso.

Is-dabci. Qof walba wuu ka farka-naxaa (nervous) waraysiga shaqada. Waa inaad ogaataa inaanad ahayn ka keliya ee farka-naxa leh.

Waxa laga yaabaa in dhawr waraysi-shaqood lagula yeesho kahor intaan lagu qaadan. Taasi waxay Maraykanka gudahiisa ka tahay wax



caadi ah. Waxa laga yaabaa inaad niyad jabto haddaan lagu qaadan kadib marka lagula yeesho waraysiga ugu horreeya, laakiinse waa inaad yeelato samir, haddaad dhiirigelin u baahatidna waydiiso qaraabadaada iyo la-taliyahaaga shaqada.

Mushaharka, Lacagaha La Reebo, Kuwa La Jaro iyo Xuquuqaha Shaqada..

Markuu shaqada ku siinayo, shaqaaleeyuhu wuxuu kuu sheegi doonaa mushaharkaagu intuu yahay, inaad saacad ahaan amma bil ahaan ku qaadan doonto, waxaad xuquuq shaqo leedahay, inta goor ee lagu siin doono, inta saacadood eed shaqayn doonto usbuuc walba amma maalin kasta. Haddaad waxaa soo dhan wax ka fahmi waydo, su'aalo ka dhiibo.

Mushahar waxa lagu siin doonaa waqti go'an oo noqon kara usbuuc walba mar, labadii usbuucba mar amma bishiiba mar, waxaanad mushaharka ku qaadan doontaa “ jeeg” ahaan. Markaad jeegga dhiganayso baanka, waa inaad la hadhaa koobbiga jeegga, kaasood rikoodh ahaan u haysan doonto.

Koobbiga jeeggu wuxuu ku tusayaa wadarta guud ee mushaharka, lacagaha lagaa reebay amma lagaa jaray, iyo wadarta saafiga ah (net pay) ee kaaga hadhay mushaharka.

Mushaharka guud waa wadarta lacagtaad shaqaysatay muddada iyada ah waxaana lagu xisaabiya tirada saacdahaad shaqaysay oo lagu dhuftay lacagtaad qaadata saacaddii.

Shaqaaleeyuhu wuxuu mushaharkaaga ka reebaa cashuurta dawladda kahor intaanu ku siin jeegga. Cashuurahaas waxaa lagu magacaabaa lacagaha reebaadda ah (withholding). Markaad shaqada bilawdo ayuu shaqaaleeyuhu kaa buuxin doonaa foom loo gudbiyo Hay'adda Dakhliga Dawladda (IRS), foomkaas oo caddanaya lacagaha lagaa jaray oo dhan. Foomku wuxuu shaqaaleeyahaaga tusayaa lacagaha la rabo in lagaa reebo. Lacagta reebaaddu waxay waafaqsantahay sharciga dawladda. Waxaa kamid ah lacagta loo reebo badbaadada bulshada (sooshal sakuuriti oo loogu talagalay hawl-gabka), ta loo reebo daryeelka caafimaadka (FICA) dadka danyarta ah ee hawl-gabka ah, cashuurta dakhliga ee dawladda dhexe iyo ta gobolada qaarkood. Lacagahaas oo dhan waxay ku qoranyihiin koobbiga jeegga.

Lacagaha la jaro (*deductions*)—waa lacago kale oo mushaharka laga gooyo. Adiga ayaa doorta inta lagaa jarayo waxaanay ku xidhantahay baahidaada iyo inta uu kaa bixinayo shaqaaleeyhu. Shaqaaluhu badanaaba waxay u isticmaalaan lacagaha la iska jaro inay iskaga bixiyaan caymiska caafimaadka, khidmadda ururka shaqaalaha, caymiska nolosha iyo hawl-gabka. Lacagahaas badhkood adiga ayaa laga jaraa, badhkoodna waxa bixiya shaqaaleeyahaaga.

Wadarta mushaharka saafiga ah. Waa wadarta lacagta kuusoo hadha kadib marka laga saaro lacagaha reebaadda iyo lacagaha la iska jaro.

Habka maamulka lacagta ee Maraykanku waa mid murugsan oo wareer badan. Hadday dhacdo inaad waxayaalaha koobbiga jeegga ku qoran wax ka garan waydo, kala tasho la-taliyahaaga shaqada ee jooga hay'addaada dib-u-dejinta.



Mushaharka uu ku siiyo Shaqaaleeyahaagu ka sokow, waxa laga yaabaa inuu ku siiyo xuquuq kale uu kamid yahay caymiska caafimaadku. Shaqaaleeyaasha qaarkood waxay bixiyaan caymis caafimaad lacag la'aan ah. Qaarkoodna waxay bixiyaan qayb kamid ah kharashka caymiska waxaanay ka jaraan shaqaalaha qaybta kale.

Shirkadaha qaarkood waxay caymiska caafimaadka u bilaabaan shaqaalaha kadib markay u shaqeeyaan 3 amma 6 bilood.

Qiiimaha kharashka ku baxa caafimaadka ee gobolada qaarkood wuxu noqon karaa mid aad qaali u ah. Sidaa darteed, markaad shaqo raadiska tahay waa inaad ku xisaabtantaa caymiska caafimaadka. Shirkad mushahar yar oo bixinaysa xuquuqda caymiska caafimaadka ayaa ka fiican shirkad mushahar badan oon lahayn xuquuqda caymiska caafimaadka.

Waxa laga yaabaa in shaqaaleeyahaagu bixiyo xuquuq dheeraad ah sida fasax caafimaad iyo fasax raaxo iyadoo ay musharadaadii kuu socoto, iyo qorshe hawl-gab. Shirkad walba sharcigeeda ku saabsan xuquuqda shaqaaleheedu wax badan buu ka duwanaan karaa shirkadaha kale. Sidaa darteed, waa inaad su'aalo ka dhiibataa si aad u ogaato xuquuqda ay shirkaddu siiso shaqaaleheeda. Mararka qaarkood, xuquuqdu waxay ku xidhantahay muddada aad shirkadda u shaqaynaysay .



Saddex kaloo xuquuqda shaqada kamid ah oo uu sharcigu bixiyaa waa kuwan:.

Lacagta Badbaadada Bulshada (xuquuqda sooshal sakuuritiga). Waa mashruuc (barnaamij) taageera dadka hawl-gabka ah ee waayeelka ah. Lacagta badbaadada bulshada eed xaq u yeelanaysaa waxay ku xidhantahay raad-raaca mushaharka aad horay u qaadatay. Badbaadada Bulshada (Sooshal Sakuuritiga) waxaa xaq u leh oo keliya shaqaalaha bixiyay lacagta reebaadda ah muddo dhan 10 sano amma ka badan.

Caymiska shaqo'laanta. Waa barnaamij (mashruuc) uu gobolku bixiyo oo taageero dhaqaale (xuquuq) siiya dadka ay shaqo la'aantu ugu dhacdo sababo aanay wax ka qaban karin dartood, sida shirkadday u shaqaynayaan oo albaabada loo xidho.

Xuquuqda Magdhawga Shaqaaluhu wuxuu siiyaa mushahar iyo caymis caafimaad shaqaalaha ku dhaawacma shaqada dhexdeeda. Barnaamijyada Hawl-gabka shaqaalaha waxa fuliya dawladdaha hoose ee gobolada.







Shaqooyinka Mushaharka Ku Bixiya Naqad Ahaanta

Dalka Maryakanka gudahiisa, waa sharci darro inaad mushahar ku qaadato naqad (lacag kaash ah) ahaan waayo taasi waxay ka dhigantahay ma bixinaysid cashuur. Hadduu shaqaaleeyuhu mushaharka kugu siiyo naqad oo aanu ku siin koobbiga jeeqga caddaynaya mushaharkaaga guud, lacagaha lagaa reebay amma lagaa jaray iyo mushaharkaaga saafiga ah, adiga iyo shaqaaleeyuhuba waxaad jebinaysaan sharciga.

Bixinta cashuurta dawladdu waxay xaq kuu siinaysaa deeqaha ay bixiso dawladdu ee ay kamidka yihiin deeqda Badbaadada Bulshada, deeqda hawlgabka shaqaalaha iyo deeqda shaqo la'aanta. Markaad shaqaysato lacag acag ee aanad bixin cashuurta, waxaad gashay danbi ah la dhuumasho cashuur oo haddii lagugu qabto aad xabsi ku geli karto. Waxaaba suurtagal ah in lagu mastaafuriyo.

Xuquuqda Shaqada

Qaxooti ahaan, xuquuqdaada shaqadu waxay lamid tahay ta uu leeyahay qofka Maraykanka ah. Shaqaaleeyuhu kuma midab-takoori karo qaxootinimadaada, shaqadana kuuguma diidi karo sababo ay kamid yihiin da'daada, midabkaaga, curyaanimadaada, xaaladdaada guurka, qabiilka iyo dhalashadaada, diintaada iyo inaad tahay lab amma dhadig toona. Hase yeeshee, shaqooyinka qaarkood waxay u furanyihiin dadka dhalashada Maraykanka haysta oo keli ah, sida shaqooyinka dawladda federaalka ah. Sharciyada shaqaalayntu waxa kalooy ka ilaaliyaan shaqaalaha khatarta shaqada iyo shukaansiga aan habboonayn ee goobaha shaqada.

Taariikhdaada Shaqda Iyo Himilooyinkaaga

Shaqada kuugu horraysa eed ka shaqaysaa markaad Maraykan timaaddo, waxay noqotaa talaabada koowaad ee aad ku dhisayso raadraaca amma taariikhdaada shaqada. Waa inaad ku dadaashaa inaad

shaqada kuugu horraysa ku nagaato ugu yaraan 6 bilood, xataa hadday shaqadu tahay mid aan kuu qalmin amma aanad jeclayn; waayo, shaqaaleeyaasha mustaqbalku waxay, intaanay shaqada ku siin, eegi doonaan sidaad uga soo shaqayn jirtay tii hore.

Waa inaad leedahay amma samaysataa himilooyin (yool) shaqo , kuna dadaashaa sidaad ku gaadhi lahayd himilooyinkaas. Si aad ku mutaysato dallacaad iyo mushahar kuu kordha, waa inaad kor u qaaddo heerka aqoonataada Af-Ingiriisiga iyo inaad xirfado kale barato.Haddaad doonayso inaad ku shaqaysato borofishankii aad hore ugu shaqaysan jirtay, waxa laga yaabaa inaad u baahato inaad tagto iskuul laguguna xidho inaad hesho shahaado (certification) cusub.Lataliyahaaga shaqada ayaa kugu caawin doona inaad samaysato qorshe aad ku gaadho himilooyinkaaga.

Waxa laga yaabaa inaad ka shaqayso dhawr shaqo oo kala duduwan inta aanad gaadhin himiladaada amma yoolkaaga ugu dambeeya. Arintaasi qayrul caadi kama ah Maryakanka gudhihiisa. Dad badan oo Maraykan ah ayaa shaqooyinka kala beddala dhawr jeer sanadaha ay shaqaynayaan dhexdooda. Laga yaabaa in gaadhista hammigaagu qaadata waqti, waxaanad u baahan doontaa inaad samir yeelato. Iskusoo wada duuboo, xasuusnoow in dalka Maraykanku dadka shaqaysta u yahay dalkii fursadaha.

Tabaha Loogu Guulaysto Shaqada

Hay'adaha dib-u-dejinta iyo dad badan oo qaxooti ahiba waxay sheegeen in tabahani kuugu caawin karaan sidaad u xajisan lahayd shaqadaada koowaad, mustaqbalkana ugu heli lahayd shaqo kasi fiican:

Markasta noqo kii shaqadiisa ku yimaadda

watigiisa. Shaqaaleeyayaashu waxay qiimeeyaan waqtiga waxaana lagaa qaadan doonaa fikrad wanaagsan haddaad mar kasta ku timaaddo waqtigaaga. Haddaad soo daahdo (habsaanto) waxa dhici karta in mushaharka lagaa dhimo.

Shaqada fasax ka qaado keliya haddaad jirrantahay.

Dadka Maraykanka badidoodu shaqadooda kama maqnaadaan haddii xanuunkoodu sahlanyahay, qaarkoodna waxaabay ku faanaan inaanay xanuun dartii weligood shaqo uga maqnaan.

Telefoon dir hadaad ka maqnaanayso shaqada.

Mar kasta la hadal madaxdaada (horjoogayaasha shaqada) haddaad ka daahayso (habsamayso) shaqada, sababtu waxay doonto ha ahaatee.

Noqo qof weji furan oo dad la-socod leh.

Waqtiga lagu jiro nasahada qadada ayaa ah waqti ku habboon inaad la baashaalto lana sheekaysato asxaabtaada shaqada. Mawaadiicda caadiga ah eey dadka Maraykanku badanaaba ka wada sheekaystaan wax kamid ah: hawada (cimilada), hawlaha maalmaha nasashada, cuntada iyo ciyaaraha (isboortiga). Waxa kaloo la heli karaa fursado kaloo badan ood dhaqankaaga kula wadaagto asxaabtaada shaqada, gaar ahaan markay tahay waqtiyada la xusayo ciidaha hiddaha iyo dhaqanka.

Noqo qof hawl-kar ah

markaad joogto shaqada. Iska ilaali la sheekaysiga shakhsiga ah ee xubnaha qooyaskaaga, asxaavtaada, iskana ilaali ku hadalka telefoonka waqtiga lagu jiro shaqada.

Su'aalaha dhiibo.

Waxaad garan waydo, su'aal ka dhiibo. Sidaasaad ku noqon kartaa qof qabta shaqo fiican kuna kasban kartaa ixtiraamka madaxdaada oo arki doona inaad dadaalayso waxna baranayso.

Baro sida loo qabto hawlaha iyo waajibaadyada cusub.

Waxa laga yaabaa inaad degdeg u dallacdo haddaad muujiso inaad diyaar u tahay inaad hanato waajibaadyo dheeraad ah oo cusub.

Haddaad goosato inaad ka tagtid (sii dayso)

shaqada, ogysiis bixi. Hadday noqoto inaad ka tagto shaqo si aad tu kale u bilowdo, waa inaad shaqaaleeyaha ogaysiis siisaa ugu yaraan 2 usbuuc ah. Weligaa shaqo ha tegin adoon helin mid cusub.



Maraykanka gudihiisa, waxbarashada waxa heli kara qof kasta, ayadoon loo eegin da'diisa, jinsiyaddiisa, diintiisa iyo darajadiisa bulshada dhexdeeda toona. Dadka badankoodu waxay waxbarashada u arkaan inay tahay dariiqa lagu muutaysto shaqo fiican iyo horumarinta heerka nololaha.

Wax-barashada dawladda ee carruurta

Wax-barashada dawladdu waa bilaash, waxaana sharci ahaan ku khasban carruurta da'doodu tahay min 6 ilaa 16 jir. Wax-barashada bilaashka ah badanaaba waxa heli kara carruurta da'doodu tahay min 5 ilaa 18 jir, sida waafaqsan sharciyada degmooyinka. Waalidiintu way ku qori karaan carruurtooda iskuulada gaarka loo leeyahay (private schools), laakiin waxa badanaaba qaali ah fiiga wax-barashada iskuuladaas.

Dugsiyada (iskuulada) dawladda waxaa wax ku wada barta, ku wada sheekaysta iskuna milma carruur kasoo kala jeeda dhalasho, diimo iyo dhaqaale kala duduwan, marka lagu jiro kalaaska iyo marka la qabanayo hawlaha kalaaska debadiisa ahba. Dugsiyada dawladda badidooda, waxaa wax kuwada barta wiilasha iyo gabdhaha. Waxa kaloo dugsiyada dawladda wax ka barata carruur curyaamiin ah amma ay maskaxda wax uga dhimanyihiin, kuwaasoo qorshahooda wax-barasho ay ka wada tashadaan waalidka iyo maamulka dugsiyadu.

Dalka Maraykanka waxaa ka jira saddex heer oo wax-barasho. Darajada ardayda kamid noqon karta heer kastaa waxay ku xidhantahay hadba degmada la joogo:

Dugsiyada Hoose waxay ka bilaabmaan dugsiyada xannaanada carruurta (5 jir) waxaanay socdaan ilaa laga gaadhayo fasalka 5aad amma ka 6aad (12jir)

Dugsiga Dhexe wuxuu ka koobanyahay fasalada 6aad ilaa 8aad.

Dugsiyada Sare oo ka kooban fasalada 9aad ilaa 12aad (18 jir). Ardayda ku guulaysata dhammaystirka dugsiyada sare, waxay qaataan dibloomada dugsiyada sare.



Heer kastaba, sannad-dugsiyeedkiisu wuxuu bilaabmaa aakhirka bisha Ogoosto amma bilawga bisha Sabteembar waxaanu dhammaadaa aakhirka bisha Maajo (Mey) amma Juun. Ardada badidoodu waxay iskuulka dhigtaan 6 saacadood maalintiiba, min Isniinta ilaa Jimcaha. Ardayda dib uga dhacda wax-barshadu waxay qaataan wax-barasho dheeraad ah bilaha Juun iyo Julaa (Luulyo); waqtiga xagaaga ah ee fasaxyada lagu jiro.

Waxa waajib ah in carruurta sida ugu dhakhsaha badan lagu qoro dugsiyada (iskuulada) isla markay yimaadaan Maraykanka. Hay'adda dib-u-dejinta ayaa kaa caawin doonta wixii aad u baahato ee arintaas la xidhiidha. Badanaaba carruurta waxa lagu daraa kalaaska ku habboon ayadoo loo eegayo da'dooda iyo heerkay ka jooheen tacliinta markoodii hore; inkastoo laga yaabo in carruurta yaryar ee aan Af-Ingiriisiga aqoon dib loogu celiyo heer hoose.

Carruurta dugsiyada (iskuulada) dhigata oo dhan waxa laga doonayaa (rabaa) inay koobbi ka haystaan raad-raaca tallaalkooda iyo caafimaadkooda (immunization and medical records). Haddaanad wax raad-raac ah haysan amma aan ilmahaaga (cunugaaga) lasoo tallaalin, hay'adda dib-u-dejinta ayaa kugu caawin doonta inay kuu qalqaaliso tallaalista.



Maamulka dugsiyadu waxay ahmiyad gaar ah siiyaan joogtaynta iskuul-dhigashada. Haddii ardaydu iskuulka ka maqnaadaan oo ay seegaan casharradooda, waxa waalidiintooda laga doonayaa (rabaa) inay keenaan caddayn qoraal ah oo faahfaahinaysa sababaha, ardaydana waxa laga doonayaa inay ku ceshadaan casharaday seegeen oo dhan.

Instkastoo ay wax-barshada dadweynaha ee dawladdu tahay bilaash (lacag la'aan), haddana waxa dhici karta inay waalidku bixiyaan woxooga kharash ah, sida kharashka ku baxa iibsashada qaar kamid ah qalabka iskuulka sida qalmaanta, warqadaha, hawlaha gaarka aha, IWM. Haddii iskuulku aad uga fogyahay gurigaaga oo aanu ilmahaagu (cunuggaagu) lug ku gaadhi karin, wuxuu bilaash ku raacayaa basaska iskuulka. Carruurta waxa loo ogolyahay inay cunto u qaataan iskuulka amma cunto qiimaheedu jabanyahay oo nafaqo leh ka iibsadaan kaafateeriyada iskuulka dhexdiisa.

Dalka Maraykanku ma laha manhaj qaran oo loogu talo-galay wax-barashada (tacliinta). Gobol kasta iyo degmo walba ayagaa go'aansada waxa lagu dhigo iskuulada. Guud ahaan, ardayda badankoodu waxay dhigtaan maaddooyinka: Af-Ingiriisiga, Xisaabta, barashada cilmiga bulshada, climi sayniska, iyo duruusta dhismaha jidhka iyo ilaalinta caafimaadka. Waxa kaloo iskuulada lagu bartaa: farshaxanka (taswiiridda), muusigga, iyo afafka qalaad. Iskuulada badankooda, gaar



ahaan dugsiga sare, waxa laga helaa ciyaaro isboorti ah iyo hawlo kale oo ay soo abaabulaan naadiyada iskuulka ee ciyaaruhu, saacadaha iskuulka la dhiganayo iyo saacadaha laga fadhiiyaba.

Waxa laga yaabaa in habka wax-dhigidda ee dalka Maraykanku aad uga duwantahay ka dalkaaga hooyo. Macalimiintu waxay carruurta ku dhiirri galiyaan inay wax ku bartaan fikiraad iyo falanqayn, oo aan dusha uun laga xafidin casharada. Waa in ardaydu mar walba dhiibtaan wixii ay su'aalo qabaan kana qay-galaan doodaha iyo hawlahaba, xataa hadii anay weli ku hadli karin Af-Ingiriisiga.

Barashada Afka Ingiriisigu wuxuu kamid yahay dhibaatooyinka ugu waaweyn ee ay carruurta la kulanto. Badanaaba waxa si dhakhso ah wax u barata carruurta da'doodu yar tahay, laakiin kuwa waaweyn muddo dheer bay ku qaadataa. Waxa jira dugsiyo badan oo bixiya casharro Af-Ingiriisi gaar ah, looguna magac daray "ESL" oo loogu talo-galay dadka cusub ee yimid; dugsiyo kalena waxay ardayda ku caawiyaan macalimiin iyo arday wax barta. Dadka cusub badankoodu waxay dhibaatooyin kala kulmaan siday iskuulada ula qabsan lahaayeen bilahooda ugu horreeya. Carruurta qaar kamid ah ayaa laga yaabaa inay gooni dareemaan (cidloodaan amma qaloodaan) marka hore. Laakiin markay afka si fiican u bartaan, waxa waanagsanaada xidhiidhka ay la leeyihiin ardayda



kale, waxay samaystaan saaxiibbo cusub, waanay ka helaan joogista iskuulka.

Arday badan oo ku cusub Maraykanka iyo waalidiintooduba waxa aad uga fajicisa (uga yaabisa) sida qayrul-caadiga ah ee ay u dhaqmaan una labistaan ardayda Maraykanku. Iskuulada Maraykanku waxay ardayda siiyaan xorriyad buuxda, laakiinse waxa ardayda laga filayaa inay u hoggaansamaan qawaaniinta iyo xeerarka iskuulada. Hadday jebiyaan qawaaniinta, waxa suurtagal ah: in lagu ganaaxo cashar-guri (homework) oo dheeraad ah, inay ku hadhaan iskuulka rawaxaadda kadib, in loo diido inay ka qayb qaataan hawlaha qaarkood, amma in dhawr maalmood laga eryo (caydhiyo) iskuulka. Dalka Maraykanka lagama ogola in ardayda la ciqaabo (karbaasho).

Iskuulada qaarkood, gaar ahaan kuwa ku yaalla magaalooyinka waaweyn, waxa ka abuurma kooxo dhallinyaro is-bahaysato ah waxana ka dhex dhaca dagaallo ay iskaga hor yimaadaan kooxo ay midabakooda amma jinsigoodu kala duwanyahay. Waxa kaloo ka jira meelaha qaarkood dhibaatooyin la xidhiidha isticmalka daroogada iyo hubka ay ardaydu keento iskuulada dhexdooda. Haddii ilmahaaga loo hanjabo amma dhibaato kale loo gaysto, waa inaanu dagaalamin ee uu macalinka amma la-taliyahiisa (koonsularkiisa) amma kalkaaliyaha macalinka u sheegaa waxa jira.



Macalimiinta iyo madaxda iskuulada Maraykanku waxay rumaysanyihiin inay lagama maarmaan tahay in waalidiintu ka warqabaan kana qayb-qaataan wax-barashada carruurtooda, waayo taasi waxay carruurta ku caawiinaysaa inay ku guulaystaan wax-barashadooda . Madaxda iskuuladu waxay had iyo jeer ku dadaalaan inay waalidiinta fahamsiiyaan wax-barashada carruurtooda, waxaanay siiyaan macluumaad, gaar ahaan waalidiinta aan ku hadal Af-Ingiriisiga. Ugu yaraan sanad walba laba jeer ayaa iskuulku kaa codsan doonaa inaad la kulanto macalimiinta si aad ugala xaajooto (naaqishto) horumarka carruurtaada. Hase yeeshee, waxaad weydiisan kartaa inaad macalimiinta carruurtaada la kulanto mar allaale iyo markaad su'aalo amma dareenno kale qabtid. Shirarka iskuulada waad ka qaybgeli kartaa xataa haddaanad Af-Ingiriisi ku hadli aqoon.

Wax-barashda Dadka Waaweyn

Dadka Maraykanka badankoodu waxay wax-barashada u arkaan inay tahay hawl socota inatay noolyihiin oo dhan. Qaar badan oo dadkaas kamid ah ayaa dib u bilaaba iskuul (wax-barasho) ayagoo waaweyn. Kadib markay gaadhaan go'aankooda ah inay sii wataan wax-barashadooda, dadka waaweyn badankoodu waxay shaqo tagaan saacado buuxa, waxaanay wax-dhigtaan habeenimada iyo labada maalmood ee usbuuca dhammaadkiisa (Sabtida iyo Axadda) ee shaqada laga fadhiyo.



Dadka qaxootiga ah naftooduna way wadan karaan wax-barashadooda ayagoo haddana shaqaysanaya. Hay'addaada dib-u-dejinta ayaa kugu caawin karta inay kuusoo ogaato fursadaha wax-barasho ee ka jira degaankaaga, sida : barashada luqadda Ingiriisiga ah –koooska loo yaqaan “Af-Ingiriisigu waa luqaddaada labaad” (ESL), barashada tacliinta heerka dugsiga sare oo loo yaqaan “Horumarinta Aqoonta Guud”(GED), iyo ka qayb-qaadashada tababarrada xirfadaha iyo kuwa borofishanka. Mar haddii aad si fiican u degto degaankaaga, waxaad heli doontaa macluumaad badan oo ku saabsan fursadaha waxbarasho ee jira. Waxa laga yaabaa inaanad fursad aad wax-barasho heer sare ah ku bilawdo heli karin sanadaha kuugu horreeya Marayakanka, laakiinse laga yaabaa inaad bilaabi karto wax-barasho heer jaamicadeed ah amma aad shahaado ku qaadan karto takhasus gaar ahaaneed. Waxa qooyiska qaxootiga dalka ku cusub muhiim u ah inay isla qorsheeyaan sidii ay maal gelin ugu helin lahaayeen wax-barashada xubnaha waaweyn ee qooyiska ka tirsan.

Degaankaaga waxa laga heli karaa fursado wax-barasho badan oo ah kuwa soo socda:

Barnaamijka ESL/Qorista iya Akhriska. Degaannada badankoodu waxay bixiyaan koorosyo Af-Ingiriisi ah oo kamid ah barnaamij loogu talo-galay dadka waaweyn oo lagu dhigto

koolajyada iyo dugsiyada sare ee degaannada. Koorosyadaasi waa kuwo u furan cid walba inkastoo qaarkood lagaa rabo inaad bixiso woxogaa lacag ah. Qaar kamid ah hay'adaha samafalka gaarka loo leeyahay, sida hay'adda dib-u-dejinta, ayaa bixiya ayaguna barashada luqadda ee barnaamijka ESL-ka. Kooroskani (fasalkani) badanaaba waa bilaash laakiin waxa la sugaa muddo aad u dheer si looga qaybgalo. Waxa kaloo jira iskuullo ka ganacsada (baayac-mushtara) barista Af-Ingiriisiga laakiinse run ahaan waa qaali. Adigoo ka barta Af-Ingiriisiga bare amma macallin waqtigiisa kuugu tabarruca ayaa iyana ah dariiq kale, kaasoo weliba fursad amma jaanis aad u wanaagsan kuu siinaya inaad wax ka barato dhaqanka iyo caadooyinka Dadka Maraykanka.

Barnaamijka ESL-ka waxaa wada dhigta rag iyo dumar da'dooda, heerka tacliintooda iyo jinsiyaddoodu-ba kala duwanyihiin. Duruusta (casharada) bilawga ah ee barnaamijka ESL-ka, ardaydu badanaaba waxay bartaan ku hadalka Af-Ingiriisiga inta ay uga baahanyihiin inay ku dhexgalaan dadka, kagana shaqaysan karaan degaankooda. Casharada/duruusta ka heerka saraysa kuwa bilawga ah, ardaydu waxay ku bartaan naxwaha (garaamarka), akhriska iyo qoraalka.

Casharada/duruusta lagu barto barnaamijka (koooska) “barashada Ingiriisiga” (literacy classes), waxay ardaydu ku bartaan akhriska iyo qorista assaasiga ah iyo ku hadalka Ingiriisiga. Maa daama ay barashada luqaddu aad muhiim ugu tahay nolosha dalka Maraykanka gudihisa, casharada/duruusta barashada luqadda (afka) waxa badanaaba lagu dhigtaa meelaha lagu dhigto barnaamijka ESL-ka iyo noocyo kale oo kamid ah wax-barashada dadka waaweyn. Hay'addaada dib-u-dejinta ayaa ku siin karta wixii kalee macluumaad ee lagama maarmaan ah.

Wax-barashada Dadka Waaweyn. Baranaamijyada wax-barashada dadka waaweyn, waxa lagu dhigtaa duruus loogu talo-galay dadweynaha guud ahaan. Mawaadiicda lagu barto waxaa kamid ah xisaabaadka, xirfadda kalkaaliyanimada, xirfadda kambiyuutarka, iyo

luqadaha ajnabiga. Koorosyadan badanaaba looguma talo-gelin ardayda aqoontooda Af-Ingiriisigu liidato, cidda ka qaybgashaana waxay bixisaa lacag.

Dibloomada Horumarinta Wax-barashada Guud

(GED). Si aad uga gudubto shaqooyinka heerka bilawga ah een xirfadda u baahnayn, dadka waaweyni waa inay badanaaba haystaan diploomada tacliinta dugsiga sare. Qaxootiga da'doodu ka weyntahay 21 jir, een tacliinta dugsiga sare kusoo qaadan dalalkoodii hooyo, waa inay dhigtaan barnaamijka horumarinta wax-barashada aqoonta guud si ay u helaan diploomada dugsiga sare ee Maryakanka looga yaqaan GED. Dibloomadan guud ahaan waa la ictiraafsanyahay, waxaanay u dhigantaa dibloomada dugsiga sare. Hay'addaada dib-u-dejinta ayaa macluumaad kaa siin karta barnaamijyadaas.

Dugsiyada (Iskuulada) Xirfadaha iyo Machadyada

Farsamada. Iskuulada iyo machadyada farsamadu waxay dadka u tababaraan xirfado takhasusyo gaar ah, sida makaaniknimada, barograam-garaynta kambiyuutarada, iyo kalkaalilinta dhakhtarrada caafimaadka jidhka iyo ilkaha. Badanaaba dhigashada barnaamiyadan koorosyadoodu waxay u baahantahay inaad taqaanno Ingiriisi heer sare ah iyo lacag fii ah ood ka bixiso. Xirfadaha qaarkood, sida xirfadlaha biyo-gelinta iyo dab-gelinta guryaha oo lagu siiyo tababar shaqada dhexdeeda, waxaa looga baahanyahay shahaado takhasus ah.

Koolajyada iyo Jaamacadaha.

Dalka Maraykanka waxaa jira laba nooc oo wax-barashada heerka sare ah. Labadaa nooc ee wax-barasho waxay kala yihiin: Koolajyada degaanada (community colleges) iyo koolajyada iyo jaamicadaha 4-ta sano ah.

Koolajyada degaanada waxa lagu qaataa barnaamij wax-barasho oo 2-ba sano ah oo ardayda u diyaariya borofishanno gaar ah, sida xisaab-xidhka iyo kalkaalinta bukaan-jiifka cisbitaalada. Borofishanada/

taskhasusyada qaarkood, markay ardaydu dhammaystaan laba sannadood oo wax-barashada koolajka degaanka ah, waxa la siiyaa shahaado qiraysa wax-barashadooda labada sano oo ay ula wareegi karaan barnaamijka jaamicadda ee 4-ta sano. Koolajyada degaanadu waxa kalooy bixiyaan shahaadada 4-ta sano ee cilmiga aadanaha, cilmiga sayniska bulshada iyo maaddooyinka cilmi sayniska.

Wagtiga lagu jiro 4-ta sano ee wax-barashada koolajyada iyo jaamicadaha, ardaydu waxa badanaaba looga baahanyahay (laga raba) inay dhammaystaan manhaj wax-barasho guud kahor intaanay u gudbin takhasusyadooda gaarka ah, sida cilmiga fiisiksiga, xisaabta, amma taariikhda, amma ayagoo ugu diyaar-garoobaya wax-barashada heerka sare ee sharciga (qaynuunka) iyo daaweynta. Koolajyada iyo jaamicadaha 4-ta sano waxa lagaaga baahanyahay inaad Af-Ingiriisiga si fiican u taqaanno, waxaana gelitaankooda shardi u ah inaad ka gudubto imtixaan Af-Ingiriisiga ah. Wax-barashada sare maaha bilaash waxaanay noqon kartaa mid aad u qaali ah. Koolajyada iyo jaamicadaha badankoodu waxay leeyihiin xafiis lagu magacaabo xafiiska mucaawanada oo bixiya macluumaad ku saabsan siday ardaydu u heli lahaayeen deyn (amaah, qaan) amma deeq wax-barasho oo ay ku daboolaan kharashka wax-barashadooda. Hase ahaatee, deeq buuxda oo wax-barasho sida lagu helaa waa dhif iyo naadir. Sidaa darteed, haddaad doonayso inaad jaamacad wax ka barato, waa inaad dhinaca dhaqaalaha iska taakulayn karto.

Dadka wadamadooda kala yimaadda shahaadooyinka dhakhtarnimada iyo injineernimada, waxa lagu xidhaa in dib imtixaan looga qaado si ay shahaado u helaan kahor intaanay wax shaqo ah ka bilaabin Maraykanka. Arrintaasi waxay qaadataa waqti dheer waxaana ku baxa kharash farabadan. Waxa kaloo dadkaasi laga doonayaa inay caddaymo ka keenaan wax-barashadooda iyo shahaadooyinka ay kala yimaaddeen wadamadooda iyo weliba inay imtixaan Af-Ingiriisi ah kaga gudbaan darajo loo cayimay (qariray). Qaxootiga doonaya inay dib usoo galaan borofishanada ay kaga shaqaysan jireen dalalkoodu, waxay aqbalaan

jagooyin hoose oo borofishankooda amma takhasuskooda ah. Matalan, qof ahaan jiray dhakhtar wuxuu aqbalaa inuu ku shaqeyo kalkaaliye shay-baadh ahaan (*lab assistant*) kahor intaan dib loo imtixaamin ee aanu shahaado cusub ka qaadan Maraykanka.



**THE AMERICAN UNIVERSITY
HEALTH INSURANCE CLAIM FORM**

MAIL TO: EARLY, CASSEY & SCHLING
4741 Springhouse Road
Bethesda, MD 20814
(301) 229-3400

Geographic Code _____ Social Security No. _____

Phone Number _____ **TO BE COMPLETED BY EMERGENCY** _____

Student's Name _____ Sex _____ Age _____

Present Address _____ City _____ State _____ Zip _____

Home Address _____ City _____ State _____ Zip _____

DATE OF INCIDENT, DATE, TIME AND LOCATION

Date of accident or illness _____

Nature of injury or illness _____

If injury, describe fully how and where accident occurred _____

If injured in any or number of ways, describe each one _____

© 1998 by AUC Health Insurance



Waxa laga yaabaa marka kuugu horraysa eed la kulanto hay'ad caafimaad oo Maraykan ah ay noqon doonto marka lagu bilaabo baadhista caafimaadkaaga. Hay'ddaada dib-u-dejinta ayaa qalqaalisa baadhista isla markaad timaaddo. Waxa baadhista looga dan leeyahay in lagu ogaado laguna daaweeyo wax allale iyo wixii dhibaato caafimaad ah ee dib-u-dejintaada carqaladayn kara, sida kartidaada shaqo amma carruurtaada kartidooda inay iskuul tagaan. Carruurtaada waxa la tallaali doona inta uu idiin socdo baadhitaanku waayo, carruurta la qorayo iskuulada dawladda oo dhan waxa laga raba inay tusaan caddaymaha tallaalka.

Markuu kuu dhammaado baadhitaankaaga caafimaad ee hore, waxaad u baahan doontaa inaad ogaato sidaad u heli lahayd daryeel caafimaad markaad adiga amma xubin qooyaskaaga kamid ahi u baahdo. Si aad arintaa ugu dhaqaaqdo, waa inaad fahamto fikradda ay dadka Maraykanku ka qabaan daryeelka caafimaadka iyo sida uu habka daryeelka caafimaadku uga shaqeeyo dalka Maraykanka.

Fikradda Maraykanka ee Caafimaadka

Dadka Maraykanku waxay rumaysanyihiin in cudurrada lagaga hortegi karo amma lagu baajin karo ilaalinta iyo joogteynta nadaafadda, isticmaalka cuntada nafaqada leh iyo fiitamiinnada, joogteynta jimicsiga jidhka iyo ciyaaraha, iyo helitaanka hurdo/seexasho kaafi ah.

Nidaamka daryeelka caafimaadka Maraykanku wuxuu si laxaad leh u kaashadaa hab-cilmieedyo lagu baadho laguna helo cudurrada iyo jeermiska keena, laguna daaweeyo qofka bukka. Taas micnaheedu waxa weeyi in dhakhtarradu, intay marka hore dadka buka/xanuunku hayo weydiyaan waxay tabanayaan, ay dabadeedna ku dhaqaaqaan baadhistaan, ayagoo isticmaalaya saamballo dhiig, kaadida amma diirka jidhka kamid ah. Natiijooyinka baadhitaanka ayaa u hawl yareeyay kuna caawiya dhakhtarka inuu gaadho go'aankii lagu daaweyn lahaa qofka buka.



Hadday dhibaato kugu tahay in dhiig lagaa qaado amma saamballo kale, kala xaajoo dhakhtarkaaga.

Dhakhaatiirta Maraykanku badanaaba ma yaqaannaan siyaabaha cudurrada loogu daaweyo dalalka kale. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad dhakhtarkaaga u macnayso sida carruurtaada loo daaweyn jiray berigii hore, sharraxaadna ka bixiso waxaad samayn jirtay iyo sidaad u waajihi jirtay daawana ugu heli jirtay xanuunnada.

Hay'adaha Bixiya Daryeelka Caafimaadka

Dalka Maraykanka waxaa jiraa dhawr meelood oo laga bixiyo daryeel caafimaad. Shaqaalaha amma hawl-wadeennada hay'addaada dib-u-dejinta ayaa kuu sheegi kara meelahaasi iyo adeegyada xannaanada iyo daryeelka caafimaadka laga bixiyo.

Waaxda Caafimaadka Dadweynaha. Gobol kastaa wuxuu leeyahay waax u qaabilsan caafimaadka dadweynaha oo xafiisyo ku leh degaanada gobolka oo dhan. Waaxda caafimaadka dadweynuhu waxay dadka ka tallaashaa cudurrada waxaanay bixisaa adeegyo kale oo lagaga hortago cudurada oo ay kamid yihiin baadhitaanka, daaweynta cudurka lakala qaado ee qaaxada (TB-da). Dadka qaxootiga ah adeegyadaasi waa u bilaash amma aad bay ugu jabanyihiin.

Kilinigyada Degaanada iyo Xarumaha Caafimaadka.

Meelahan waxa lagu bixiyaa adeegyada assaasiga ah ee caafimaadka iyo talo-siinta. Qaarkoodna waxaabay bixiyaan adeegga xannaanada ilkaha iyo baadhitaanka indhaha. Kilinigyada qaar ku yaalla magaalooyinka ayaaa daaweeya dad xanuunno gaar ah la buka, sida dumarka uurka leh amma dadka qaba cudurka HIV/Eeydiska (HIV/AIDS). Kilinigyadu waxay aqbalaan caymiska qof u gaar ah, amma caymiska Mucaawanada Daawada ee dawladda (Medicaid). Qaar badan oo kilinigyada ka mid ah ayaa qaata lacag fii ah oo ku xidhan qofka awooddiisa dhaqaale. iyo dakhligiisa. Dadka bukaanka ahi waxay badanaaba u baahdaan inay ballan la samaystaan kilinigga si maalin iyo saacad go'an loo daaweeyo, inkastoo kilinigyada qaarkood aqbalaan in dadku iska yimaadaan ayagoon wax ballan ah saymaysan.

Dhakaatiirta Barayfadka (brifaatiga) ah.

Dhakaatiirta qaarkood waxay ku shaqo leeyihiin inay bixiyaan daryeel caafimaad iyo daaweynta guud ooy kamid yihiin baadhista caafimaadka dadka ee sanad kasta. Qaar kalena wazxay ku takhasusaan daaweynta cudurro gaar ah. Dhakhtarrada qaarkood iskood bay gooni ahaan u shaqaystaan, qaarkoodna, ayagoo takhasusyo kala jaadjaad ah isugu jira ayay koox ahaan u wada shaqaystaan, asagoo mid walba taskhasuskiisa gaarka ah ugu adeegayo qofka buka. Qofka bukaa waa inuu ballan dhigtaa si uu dhakhtar u arko. Xafiiska dhakhtarku wuxuu badanaaba ka raba qofka buka inuu soo caddeeyo inuu lacagta iska bixin karo amma uu haysto caymis iyo in kale.

Dhakhtarada Madaxa Bannaan (barayfadka ah) ee

Ilkaha. Qaar kamid ah dhakhtarada ilkuhu waxay ka shaqeeyaan xannaanada ilkaha ee guud oo ay kamid yihiin nadiifinta iyo buuxinta ilkaha, qaar kalena waxay ku takhasusaan noocyo gaar ah oo ay kamid yihiin xanuunada ilkuhu. Dhakhtarrada ilkaha xafiisyadoodu waxay bukaan-socodka ka rabaan inay lacagta khidmadda iska bixiyaan ilsa markaaba hadday xafiiska ballan ku yimaadaan. Caymiska caafimaadku inta badan ma daboolo kharashka xannaanada ilkaha.



Farmasiiyada Dawooyinka. Waa dukaamada aad ka heli karto amma ka iibnsan karto daawada dhakhtarku kuu qoro iyo kuwa aan u baahnayn inuu dhakhtar kuu qoro oo ay kamid yihiin dawooyinka xanuunka yareeya (dajiyaa), sida asbriinka oo kale. Farsamo-yaqaanka farmasiiga ayaa talo kugu siin kara daawada aad qaadanayso nooceda iyo inaad dawooyinka qaarkood bilaaw dhakhtar iska qaadan karto iyo in kale. Markuu dhakhtarku dawada kuu qoro kadib, waa inaad amma lacagta iska bixisaa, amma macluumaadka caymiskaaga siisaa farmasiga sii uu khidmadda caymisku kaaga bixiyo.

Cusbitalada. Dhakhtarrada iyo kilinigyada ayaa bukaan-socodka qaba xanuunno gaar ah usoo gudbiya cusbitalada si loogu baadho amma loogu qalo. Xannaanada cusbitaladu aad bay qaali u tahay waana inaad mar walba amma cusbitalaalka siisaa macluumaadka caymiskaaga, amma aad iska bixisaa lacagta isla marka adeegga lagu qabto.

Qolalaka Xalladda Degdegga ah (amarjansi). Meelahan oo ku yaalla cusbitalada dhexdooda amma meelo kaleba waxa lagu xalliyaa dhibaatooyinka caafimaad ee kediska ah aadna halista u ah. Qofku uma baahna ballan qabsasho si uu ku tago qolka gargaarka degdegga ah, laakiinse waa meelo mar kasta laga buuxo. Haddaan xaalkaagu

khatar ku sugnayn, laga yaabaa inaad muddo aad u dheer sugto. Haddaanu xanuunkaagu ahayn xaalad degdeg ah, waa inaad ballan ka dhigataa kilinigga amma xafiiska dhaktarkaaga. Adeegga laguugu qabto qolka xaaladda degdegga ah mar walba waa qaali.

Adeegga Ambalaaska. Adeegani wuxuu gargaar caafimaad oo degdeg ah iyo gaadiid siiyaa qof xanuunsanaya amma dhaawac ah oo u baahan in si degdeg ah loogula cararo qolka xaaladda degdegga ah, marka aanay jirin si kaloo qofkaasi lagu siiyo gargaar caafimaad oo degdeg ah.

Daryeelka Caafimaadka Maskaxda.

Dadka Maraykanka ahi waxay rumaysanyihiin in caafimaadka maskaxdu muhiim u yahay sida ka jidhka, xannaanada caafimaadkana waxaa kamid ah daaweynta uu qofka siiyo dhakhtar ku takhasusay caafimaadka maskaxda. Dadka qaxootiga ah amma dadka kale ee dhawaan soo galay Maraykanku waxay u baahanyihiin inay fiiro gaarah siiyaan caafimaadka maskaxdooda, waayo waxa weli ku sii dheer dhibaataadii ay kala soo kulmeen barakacoodii amma dhoofoodii, waxaanay tabanayaan walwalka ka haysta laqabsashada nolosha cusub ee Maraykanka. Haddaad dareento in xaaladdaadu kaa tan roonaato, ood u maaro weydo hawl-maalmeelyada, islana hadasho, waa inaad raadsato adeegga caafimaadka maskaxda. Adeegyada caafimaadka maskaxda waxaa badanaaba laga helaa kilinigyada dhakhtarrada madaxa bannaan, laakiin adeegyada caafimaadka maskaxda waxa kaloo bixisa hay'adda adeegyada bulshada. Hay'adaha dib-u-dejinta qaarkood ayaa ayaguna bixiya adeegyo talo-siin ah, kooxo taageero ah iyo kooxo xirfadaha nolosha ah, waxaana laga yaabaa inay kuu helaan adeegyo kale oo ku saabsan caafimaadka maskaxda.

Kharashka Daryeelka Caafimaadka

Daryeelka caafimaadka Maraykanku aad buu qaali u yahay waxaana bixinta kharashka adeegyada caafimaadka ka mas'uul ah qofka ee maaha dawladda. Qiimaha dawooyinka ayaa aad qaali u ah. Sidaa darteed, dadka badankoodu waxay isku halleeyaan barnaamijyo caymis ah. Shaqaaleeyaal (employers) badan ayaa shaqaalahooga u hura inay

barnaamij caymis ah geliyaan lacagtana badh ka bixiyaan, inta soo hadhana ka jara mushaharkooda si aanu qofku uga warwarin hawsheeda. Waxaa badanaaba dhacda in caymiska la sugo muddo, taasoo noqonaysa waqitga shaqada lagu qoray iyo waqtigaad caymiska xaq u yeelatay inta u dhaxaysa.

Shaqaaleeyaashu waxay badanaaba caymiska shaqaalahooda u wakiishaan hay'adaha caymiska: HMO amma PPO oo la shaqaysta koox dhakhtarro ah iyo kilinigygo ugu qaabilsan daryeelka iyo daaweynta. Shaqaale kasta oo caymiskan ku jira waxa u xilsaaran dhakhtar. Dhakhtarkaasi ayaa qofka shaqaalaha ah daawentiisa u qaabilsan isagaana ogolaada markuu tegayo qolka gargaarka degdegga ah amma uu cusbitaal galayo amma uu arkayo dakhtar takhasus gaar ah leh Mararka qaarkood, kharashka ku baxa qofka shaqaalaha ah waxaa gebi ahaantiisba bixisa ha'adda caymiska HMO, amma PPO. Mararka qaarkoodna waxaa kharashka la baxa qofka caynsanaha (insured) ah.

Haddii uu shaqaaleeyahaagu kuu huri waayo xuquuqda caafimaadka, waxaad caymiska toos uga iibsana kartaa hay'adaha caymiska midkood, HMO amma PPO. Talooyin arrintan ku saabsan waxa ku siin kara hawl-wadeennada hay'adda dib-u-dejinta.

Si loo caawiyo dadka dakhligoodu hooseeyo (dan-yarta), waxa jira barnaamijyo dawladdu maamusho oo bixiya badh kamid ah kharashka daryeelka caafimaadka. Dadka qaxootiga ahi waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan laba barnaamij oo ah mucaawano caafimaad midkood: Mucaawanada Caafimaadka ee Qaxootiga (RMA), amma Mucaawanada Caafimaadka (Medicaid). Labada barnaamijba waxay kharashka daawada ka bixiyaan dadka dan-yarta ah ee dakhligoodu hooseeyo, laakiinse waxaad isticmaali kartaa keliya inta shaqaaleeyahaagu kugu darayocaymis amma aad mid kuu gaar ah ka gelayso. Si aad u dalbato barnaamijyadaas, waa inaad buuxisaa foomam caddaynaya dakhligaaga iyo macluumaad kale oo kugu saabsan. Waxa badanaaba la xaqiijiya inaad xaq u leedahay (u qalanto) barnaamijka iyo in kale. Dhakhaatiir badani caymiska noocan oo kale ah ma qaataan (ma tixgaliyaan).

Dadka qaxootiga ah ee da'doodu ka weyntahay 65 jir waxay xaq u leeyihiin in la siiyo kaalmo caafimaad. Barnaamijka Kaalmada caafimaadku (medicare? Or Medicaid?) waa barnaamij kasoo fula dawladda dhexe oo dadka da'doodu ka weyntahay 65 jir ka bixiya kharashka caafimaadkooda. Kaalmada Caafimaadku waxa kalooy bixisaa qayb kamid ah qiimaha dawooyinka.


Hay'addaada dib-u-dejinta ayaa kaa caawin karta sidaad u fahmi lahayd kaalmada caafimaadka aad heli karaysid.

Xuquuqdaada Caafimaadka


Meel kastood kaga nooshahay Maraykanka, waxaad xaq u leedahay adeeg turjumaadeed iyo asturaad:

Adeegga turjumaadda. Waxaad u baahantahay inaad fahmi karto ood is af-garataan dhakhtarkaaga si ay suurtagal u noqoto inaad hesho daawo fiican. Haddaad is leedahay waxaad u baahantahay in lagaa caawiyo dhinaca luqadda si aad ula xidhiidho dhakhtarkaaga, waxaad xaq u leedahay kaalmo turjumaan. Sidaad ku heli lahayd qof turjumaan ah oo ku caawiya, kala tasho hay'addaada dib-u-dejinta.

Asturaadda (privacy). Wax allaale iyo wixii idin dhex mara adiga iyo dhakhtargaagu sharci ahaan waa qarsoodi. Dhakhtarkaagu uma sheegi karo qooyiskaaga (faamiligaaga), asxaabtaada iyo shaqaleeyahaaga toona arrimo ku saabsan caafimaadkaaga asagoon kaala tashan. Arrimahaas qarsoodi ah waxa kamid noqon kara warar (macluumaad) ku saabsan cudur aad qabto oo khatar ah, sida HIV/Eeydiska (HIV/AIDS) amma cudurro kale. Adiga oo qudha (kelidaa) ayaa go'aan gaadhi kara inaad arrintaada u sheegto faamiligaaga iyo asxaabtaada iyo in kale. Dhakhtarku uma sheegi karo haddaanad oggolayn. Laakiin sharcigu wuxuu dhigayaa inay adiga waajib kugu tahay inaad dhakhtarkaaga u sheegto haddaad qabto cudurka HIV/Eeydiska (HIV/AIDS). Haddaad u sheegi waydo waxaad mudan kartaa ciqaab culus.



SALE



Nolosha Maraykanku waa mid aad qaali u ah. Waxaa lagama maarmaan noqon doonta inaad si habboon u maamusho lacagtaada si aanad u gelin kharash ka badan inta kaa go'da. Shaqaalaha hay'addaada dib-u-dejinta ayaa kugu caawin doona sidaad u samaysan lahayd miisaaniyad (qorshe lacageed), si aad u ogaato intaad lacag haysato, intaad u baahantahay inaad kharash-garayso iyo intaad u baahantahay inaad dhigato.

Qorshaynta kharashyada

Bil walba waxaad u baahan doontaa inaad bixiso kharashyadaada assaasiga ah. massaariiftaada ugu waaweyni waxay noqon doonaan kuwan:

- **Kirada.** Waxa laga yaabaa in Kiradu tahay kharashkaaga ugu culus ee bil kasta
- **Kharashka dabka, gaasta iyo biyaha, iyo qashin-gurka.** Qaar kamid ah kharashyadan ayaa noqon kara qayb kamid ah kirada, laakiin mid amma laba kamid ah waxa laga yaabaa inaad gooni ahaatooda u bixiso. Biilasha dabka, gaasta amma saliidda ee bilaha qaboobaha iyo kulaylaha ah ayaa ka badnaan kara biilasha intooda kale.
- **Kharashka dabka, gaasta iyo biyaha, iyo qashin-gurka.** Qaar kamid ah kharashyadan ayaa noqon kara qayb kamid ah kirada, laakiin mid amma laba kamid ah waxa laga yaabaa inaad gooni ahaatooda u bixiso. Biilasha dabka, gaasta amma saliidda ee bilaha qaboobaha iyo kulaylaha ah ayaa ka badnaan kara biilasha intooda kale.
- **Cuntada.** Waxaad lacag ku madhxisan kartaa haddaad dukaamada ka raadsato cuntooyin qiimahoodu aad u jabanyahay.
- **Xannaanada Carruurta.** Laga yaabaa in kharashka xannaanada carruurta noqdo mid aad u culus bil walba. Haddii aad qalqaalin kari weydo inuu xubin kamid ah faamiligaaga amma saaxiib kuu ilaaliyo ilmaha, hay'addaada dib-u-dejinta ayaa kugu caawin doonta inay kuu hesho cid kuu haysa carruurta amma sidaad u dalban lahayd caawimada xannaanada carruurta.



“Dhowr sano ka dib markaan imi Maraykanka, waxaan go'aansaday inaan baabuur gato (iibsado). waxaan mulkiilaha ka dalbaday deyn (amaah), sarkaalka deynta bixiyaa wuxuu i weydiiday inaan weligay deyn qaatay iyo in kale.

Waxaan u sheegay inaan hadda ka hor deyn qaatay, waxaanan tusay dayntii IOM ee an dhammaanteed dib u bixiyay. Madaama an tusay inaan deyn iska bixin karo, dalabkaygii daynta waa la ii oggolaaday.”



- **Kharashka Gaadiidka.** Waxaa kamid ah kharashka kaaga baxa tegitaanka iyo ka imaatinka shaqada, tegitaanka dukaamada iyo ballamaha. Waxaa jira meelo badan oo laga helo tikidhada lagu raaco basaska iyo tareennada oo jaban.
- **Kharashka Tilifoonka.** Waxaad u baahan doontaa inaad bil walba bixiso biilka tilifoonka. Xassuusnoow in tilifoonkaad u dirto waddamo kale noqon karo qaali.
- **Amaahda Safarka.** Waxaa waajib kugu ah inaad iska bixiso amaahdii noolka lagaaga keenay dalkaad ka soo baxday.
- **Lacag kaydinta iyo kaalmaynta faamiliga dibedda kaa jira.** Haddaad leedahay himilo amma qorshe ballaadhan ood ku doonayso inaad wax ku barato amma guri ku dhisato, waxa laga yaabaa inaad u baahato inaad bil walba qadar laca ah ku kaydsato baanka. Waxa kaloo laga yaabaa inaad rabto inaad lacag u dirto xubno kamid ah faamiligaaga kaa maqan. Markaaad shaqaysato, eed ogtahay inta kharashkaagu noqon doono bill kasta, waxaad garan kartaa intaad lacag dhigan karto iyo intaad diri karto bil walba.
- **Daryeelka caafimaadka.** Mar hadaad haysato shaqo saacado-buuxa (full-time), waxa laga yaabaa in lagugu daro caymis caafimaad. Hase yeeshee shaqooyinka heerka hoose ee bilawga ah ma bixiyaan caymis bilaha hore ee shaqada. Waxa laga yaabaa inaad caymiskaaga iibsato.

Meelaha laga adeegto

Dukaamada iyo suuqyada wax laga iibsado ee Maraykanka waxaa laga helaa alaab iyo adeegyo noocyadoodu kala duwan yihiin;shan meelood oo ah meelaha laga adeegto wax ka mid ah: .

Suuq-Weynaha (Faras-magaalaha). Suuq-weynaha waxa ku yaalla dukaamada ay dadka badankoodu ka iibsadaan cuntooyinka. Waxa kaloo tukaamada badankoodu iibiyaan alaabta nadiifinta guryaha, daawooyinka iyo kiriimyada is-qurxinta, joornaalada (jaraa-idka), maacuunka, iyo daawooyinka aan u baahnayn in dhakhtar kuu qoro. Dad badan ayaa markay wax iibsanaanayn istimaala tikidhada xayaysiiska ee qiimaha jebiya (kuubban), amma qiimaha laga dhimaa markay iibsadaan alaabta lagu xayaysiinayo summadda dukaamada.



- **Dukaamda laamaha badan (suuqa dadan ama moolasha).** Dukaamada noocan ah waxaa lagu iibiyaa alaabta guryaha, sida sariiraha iyo kuraasta, maacuunka dabka ku shaqeeya, dharka, kabaha iyo waxyaalo kaloo badan. Qaarkood waxay iibiyaan alaab qiimahoodu aad u jabanyahay.
- **Dukaamada Alaabta Rahiiska ah.** Waa dukaamda lagu gado (iibiyo) alaab duug ah oo hore loosoo isticmaalay, sida gogosha iyo maacuunka guryaha, dharka, iyo waxyaalo qiimahooda aad loo dhimay.
- **Dukaamada cuntooyinka jinsiyadaha (ethnic).** Dukaamdan waxa leh oo maamula dad dalal kale ka soo guuray amma qaxooti hore ahaan jiray. Dukaamadani waxa badanaaba laga helaa meelaha ay ku noolyihiin dadka ka soo guuray (migrants) dalal kale. Waxa laga yaabaa in cunto dalkaagii hooyo caan ku ah aad ka hesho dukaan iibiya cuntada jinsiyadaha (etnigga ah).
- **Iibka daaradda/garaashka guriga.** Iibka noocan ah waxay dadku ku sameeyaan daaradda amma garashka guryahooda. Waxay ku iibiyaan amma ku xaraashaan alaab guri oo duug ah, sida gogol amma dhar amma maacuun, iwm. Iibka daaradda iyo geerashka waxa lagu xaysiiyaa joornaalada iyo jaraa-idka iyo calaamado tiirarka waddonyinka ku yaal lagu dhajiyi si ay dadku arkaan.

Cashuur Bixinta

Lacagta cashuurta ah ee laga qaado dadka Maraykanku waxa lagu bixiyaa kharashka ku baxa adeegyo badan oo loo qabto dadweynaha ay kamidka yihiin qaxootigu. Kharashyada lagu bixiyo lacagta cashuurta waxa kamid ah kuwa ku baxa: wax-barashada, daryeelka dariiqyada iyo waddooyinka, sugidda ammaanka, dab-demiska, adeegyada xaaladaha degdegga ah, iyo barnaamijyada adeegga bulshada. Dadka ku nool dalka Maraykanku waxay bixiyaan saddex nooc oo cashuur ah:

Cashuurta Dakhliga. Qof kasta oo shaqeyaa wuxuu bixiyaa cashuurta dakhliga ee dawladda dhexe, gobolada qaarkoodna waxay bixiyaan cashuurta dakhliga ee gobolka. Cashuurahan waxa mushaharkaaga ka reeba shaqaaleeyahaaga. Sannad walba waa inaad buuxisaa ood xeraysaa foomamka cashuurta ee dawladda dhexe iyo dawladda gobolka. Foomamkaasi waxay caddeeyaan lacagta cashuurta ah ee shaqaaleyahaagu kaa reebay sannadka dhammaaday si ay dawladdu u ogaato in lacag lagu leeyahay iyo in lacag lagu soo celiyo. Hay'addaada dib-u-dejinta ayaa kugu caawin karta sidaad u heli lahayd, sidaad u buuxin lahayd iyo sidaad u xerayn lahayd foomamka. Foomamka xerayntoodu waa inaanay ka danbayn bisha Abriil 15-da sannad walba.

Cashuurta Hantida Gaarka ah. Lacagaha cashuurta hantida waxa soo xareeya dawladda hoose, waxaanay ku waajibtay in laga bixiyo hantida ay dadku gaarka u leeyihiin sida: guryaha, dhulka, iyo dhismayaasha. Gobolada qaarkoodna waxay dadka ka qaadaan cashuurta hantida baabuurta.

Cashuurta Iibka. Dadka ku nool gobolada badankoodu waxay cashuur ka baxshaan shayga ay iibsadaan. Waxa laga yaabaa waxyaalaha qaar, sida cuntada iyo daawooyinka, in laga dhaafo cashuurta. Cashuurtaasi waxay dul-saar ku tahay qiimaha shayga waxaanay noqonaysaa qiimaha oo boqol loo qaybiyay qayb kamid ah waxaana lagu reebaa khasnadaha lacag qabashada dukaamda. Qiimaha ku qoran shayga dukaanka dhexyaal laguma darin cashuurta iibka.

Baanka (Bangiga) Lacagta

Si ay aamin ugu noqoto, dadka Maryakanku waxay badanaaba lacagahooda dhigtaan baananka amma ururrada amaahda, halkay ka dhigan lahaayeen guryahooda. Lacagta aad dhigato baanka waxa damiinata dawladda Maraykanka.

Hadday lacagtu lunto amma la xado, dawladda ayaa lacag magdhaw ah ku siisa.

Baananku waxay leeyihiin akoonyo lacagta la dhigto. Akoonyada qaarkood waxa laga bixiyaa lacag khidmad ah. akoonyadu waxay u kala baxaan laba nooc:

Akoonyada kaydinta lacagta. Waa akoon lagu kaydsado lacagta. Haddaad lacag dhigato akoonka kaydiska baanka, waxa kuugu biiraysa lacag dulsaar ah (interest)

Akoonka Jeeqga. Akoonka waxa loogu talo-galay inaad ku bixiso kharashyada lagugu leeyahay. Baanka ayaa ku siinaya jeegag aad ku saxiisdo magacaaga si aad ugu bixiso biilasha lagugu leeyahay, sida kirada guriga. Waa inaad ka digtoonaato inaad qorto jeeg ka badan lacagta kuugu jirta akoonka jeegga. Baananka qaar ayaa lacag dulsaar ah kuugu dara lacagta kuugu jirta akoonka jeegga.

Amaah Qaadashada iyo Hirgellinta Raad-raac Amaah-qaadasho Wanaagsan.

Dadka Maraykanku caadi ahaan waxay isticmaalaan wax lagu magacaabo kaadhka amaahda (deynta) iyo qorshaha amaahda si ay u awoodaan inay iibsadaan waxyaalaha qaaliga ah sida baabuurta iyo alaabta guryaha. Haddaad haysato kaadhka (credit card) amma qorshaha amaahda, waxa lagu ogolyahay inaad amaah ku qaadato alaab qaali ah, dabadeedna, halkaad mar keli ah ka wada bixin lahayd lacagta oo dhan, aad bil kasta in yar oo awoodaada ah bixiso.

Markaad isticmaasho kaadhka amaahda amma qorshaha amaahda, waxaad amaahanaysaa lacag. Baanka amma shirkadda ku siisay kaadhku waxay ku xisaabiyaan lacag dulsaar ku ah lacagta amaahda oo lagaa rabo inaad ku bixiso muddo lagu cayimay (qariray). Haddaad lacagta ku bixin weydo waqtiga lagaa doonayo, baanku wuxuu kaa qaadanayaa alaabtii aad ku iibsatay kaadhka, waxaanu ku saarayaa lacag ganaax ah.

Haddaad goosato inaad qaadato kaadhka amaahda, u isticmaal si habboon oo taxaddar ku jirto. Si aad u dhib yar ayaad u geli kartaa deyn culus oonad bixin Karin. Kahor intaanad qaadan amaahda (deynka), hubi inaad iska bixin kari doonto inta lagaa rabo inaad bixiso bil walba.

Mar haddaad qaadato deyn (amaah), waxaad abuuraysaa raad-raaca amaahda. Hay'do lagu magacaabo hay'adaha ka war-bixinta amaahda ayaa laga heli karaa warbixin tusaysa raad-raac ku saabsan sidaad u bixin jirtay amaahda. Haddaad amaahda ku bixiso waqtiga lagu cayimay, waxaad noqonaysaa qof qaan-bax wanaagsan oo aamin ah , baanankuna way ogolaadaan inay kaadhahd ku siiyaan lacag kalena ka amaahato; Haddiise aad lacagta ku bixin waydo waqtiga lagu qabtay amma aad ka booddo, waxa xumaanaya raad-raaca qaan-bixintaada taasoo keenta in baananku diidaan inay mar danbe ku siiyaan wax amaah (deyn) ah.

Sababaha dartood, waxa lagama maarmaan ah inaad dhinac u leexiso lacag aad bil walba ku bixiso amaahdii dhoofkaaga. Waa fursaddaada koowaad ee suurtagal ka dhigi karta inaad yeelato raad-raac qaan-bax wanaagsan. Waxa kuu fududaan doonta inaad qaadato deyn kale, haddii la arko inaad tii hore u bixisay si wanaagsan. Hay'addaada dib-u-dejinta weydiiso inay ku siiso macluumaad ku saabsan sidaad iskaga bixin lahayd deyntii dhoofka.

Waxa kalood u baahantahay inaad bil walba joogto ahaan u bixiso kirada guriga iyo biilasha dabka iyo biyaha. Haddaad biilasha la daahdo, shirkadda lacagta kugu leh ayaa kaa qaadi doona tallaabo sharci ayagoo istimaalaya adeegga hay'adda qaan ururinta. Talaabadaa sharciga ahi waxay ka muuqan doontaa warbixinta raad-raacaaga qaan-bixineed.

This facility is
smoke free.



Sharciyada dalka Mayaraykanka waxa looga dan leeyahay in lagu ilaaliyo xuquuqdaada. Mar haddaad noqoto qof deggan Dalka Maraykanka, waa inaad aqoon kugu filan u leedahay xuquuqda uu sharcigu ku siinayo iyo waajibaadka ku saaran.

Xuquuqdaada

Qaxooti ahaan, waxaad leedahay xuquuq la mid ah tuu leeyahay qofka kastoo kale oo ku nool Maraykanka. Xuquuqahaas waxa ka mid ah: xorriyadda hadalka, xorriyadda diinta, iyo xorriyadda kulammada. Laguma soo qaban karo, xabsina laguma geyn karo haddaad cabirto ra'yigaaga, ku camal-fasho diintaada amma la kulanto asxaabtaada. Waa inaad xor u tahay inaad sidaad doonto wax u caabuddo, u labisato, una fushato hawl-maalmeedkaaga, mar haddaad daacad u tahay sharciyada u degsan Maraykanka.

Dadka Maraykanka deggan oo dhammi waxay xaq u leeyihiin sidii loogu ilaalin lahaa xuquuqdooda shaqada, guri-siinta, wax-barashada, iyo dhammaan adeegyada kale ee dawladda oo dhan. Sharciyada Maraykanku waxay mamnuucayaan in qofka lagu takooro midabkiisa, diintiisa, jinsiyaddiisa iyo dhaqankiisa toona. Inkastoo dhibaatooyin dhawaan dhacay ku dhaliyeen dadka Maraykanka cabsi weyn, murugo iyo cadho, haddana badankoodu wax cuqdad ah kama qabaan dadka qaxootiga amma imigarantiga ah, sababtoo ah waxay ku leeyihiin tafiir imigaranti amma qaxooti ahaan jiray. Hase yeeshee, waxa jira qaar kamid ah dadka Maraykanka oo fikrad xun ka haysta dadka ka yimid dalalka kale. Haddii lagu midab-takooray amma lagaaga duudsiyay xaqaaga sababo ah midabkaaga, amma luqadda aad ku hadasho, waxaad xaq u leedahay inaad u magan gasho ciidanka ammaanka, qaaddana tallaabo sharci ah. Degaannada badankooda waxaa jira adeegyo dadka ka caawiya arrimaha sharciga. Hay'addaada dib-u-dejinta ayaa kugu caawin karta sidaad ku heli lahayd.

Haddii lagugu soo oogo danbi, danbiile ma tihid illa inta danbigaasi kugu caddaanayo.



Waxaad xaq u leedahay inaad qareen (abukaato) ku difaaca qabsato. Haddii aad kharashka qareenka iska bixin kari weydo, maxkamadda ayaa kaa bixin doonta. Hase ahaatee, haddaad sharciga jebiso, hay'adda dib-u-dejintu masoo dhex-gelayso kiiska, kumana difaacayso.

Waajibaadyada Ku Saaran.

Dalka Maraykanka waxaa jira saddex sharci oo lagu dhaqmo. Sharciga federaaliga oo ah sharci loo dejiyay inuu qabto qof kasta oo ku nool Maraykanka, sida sharciga la dagaallanka daroogada. Goboladuna sidoo kale waxay leeyihiin sharciyo u gaar ah. Matalan, gobolada qaarkood, qofka waxa loo ogolyahay inuu qaato liisanka baabuurta markay da'diisu gaadho 16 jir. Gobolada qaarna waa inuu qofku noqdaa 18 jir. Waxa waajib ah inaad barato sharciga Maraykanka waayo waxa dhici karta inuu aad uga duwanaado sharciyada dalkaagii hooyo..

Dalka Maraykanka waxaad mudan kartaa ciqaab haddaad jebiso sharciga, xataa haddaanad garanayn sharcigaad jebisay. Qaxooti ahaan, waxaad u baahantahay inaad xassuusnaato inaad dambiyada qaarkood ciqaabtaad muutaysan kartaa tahay mastaafuris oo lagugu celiyo dalkaagii hooyo. Hay'addaada kala tasho wixii aad su'aalo ka qabto sharciyada.

Xuquuqda iyo waajibaadka Qaxootiga la keeno Maraykanka



Waxa waajib kugu ah inaad taqaanno qodobadan hoos ku qoran ee la xidhiidha sharciyada:

- Waa danbi culus inaad iibiso/gaddo daroogada, mukhaadaraadka iyo waxyaalaha kale ee mamnuuc ka ah Maraykanka. Haddaad sharcigan jabiso waxa dhici karta in waddankaagii lagu mastaafuriyo. Hay'addaada dib-u-dejinta weydii oo hubi in daroogo ama mukhaadaraad waddankaaga sharciyan loo isticmaalo inuu Maraykanka mamnuuc ka yahay iyo in kale.
- Waa danbi inaad la dagaallanto, disho amma aad nabarro u gaysato xaaskaaga amma ilmahaaga. Waxa kaloo danbi ah inaad ilmahaaga kaga tagto meel cidlo ah ayadoon lala joogin. Dalalka qaarkood, waxaa caadi ah in ilmaha weyni ilaalin karo ilmaha ka yar, laakiin Maraykanka, carruurta yaryar waa inuu ilaaliyaa qof weyni. Karbaashidda ilmaha waxaa loo arkaa inay tahay waxyeellays, cidla kaga tegistana daranyays. Labadaas danbiba waxay ku horseedi karaan in carruurtaada ay kaala wareegto hay'adda ilaalinta xuquuqda carruurta.

- Faraxumayska carruurta da'doodu ka yartahay 18 jir waa danbi culus oo keeni kara xabsi iyo mustaafuris. Waxa kaloo danbi ah inaad guursato hal xaas in ka badan.
- Haddaad carruur leedahay ood xaaskaaga kala tagtaan, adigaa ka mas'uul ah dhaqaalaha iyo wax-siinta carruurtaad isku leedihiin xaaskaagii hore. Arrintaas oo loo yaqaan taageerada carruurta waana waajib sharci ah. Haddii aad kasoo bixi weydo waajibka taageerada carruurta, waxaad dhaawacaysaa xaaladdaada amigreyshinka.
- Carruurta yaryar ee ku nool Maraykanka looma ogola inay khamriga cabbaan ilaa iyo intay ka gaadhayaan 21 jir, loomana ogola inay dukaamada ka gataan. Guud ahaan, lama ogola waana danbi inaad khamri ku cabto dariiqyada, laakiin baararka iyo makhaayadaha cuntada waad ku cabbi kartaa.
- Waa danbi inaad qof aad meel ka wada shaqaysaan faallo daandaansi ah amma ilaaq-shukaansi aan habboonayn kula kacdo.
- Waa danbi inaad haysato hub aanad liisan u haysan, meel kastood joogto. Waxa iyana danbi ah inaad soo kalluumaysato amma soo ugaadhsato bilaa liisan, waana inaad ku dhaqantaa sharciyada kale ee la xidhiidha daryeelka khayraadka dabiiciga ah.
- Waa danbi inaad baabuur kaxayso haddaanad liisan u haysan, lamana ogola inaad baabuur waddo adigoo sakhraansan. Wadista baabuurta adigoo sakhraansan waa danbi aad u culus waxaanad ku muutaysan kartaa liisankoo lagaa qaado, xabsi amma mustaafuris.

- Gobolada ayaa leh sharci loo dejiyay isticmaalka suunka baabuurta. Waalidka waxa laga raba inay mar kasta hubiyaan inay carruurta yaryar suunka u xidhaan iyaga naftooduna xidhaan.
- Waa danbi in sigaarka lagu cabbo meelaha dadka ka dhexeeya sida tiyaatarrada iyo xafiisyada. Meelaha qaarkoodna, sida makhaayadaha cuntada, waxa sigaarya-cabku fadhistaan meelo loogu talo-galay.
- Dalka Maraykanku wuxuu leeyahay sharci ilaaliya xuquuqda xawayaanka. Waa danbi inaad daranyayso, disho amma aad gawracdo xawayaan.

Sharcigaagaad dalka ku joogto iyo Waddaninimo (dhalasho)

Dib-u-dejintu waa go'aanka kama danbaysta ah ee qaxootiga. Qaxootinimadu waxay kuu suurto-gelinaysaa inaad rasmi ahaan u joogto Maraykanka, aakhirkana qaadato dhalasho Maraykan ah.

Sanadla kuugu horreeya Maraykanka, waxaad ku joogtaa xaalad qaxootinimo ah. Waqtigaa isaga ah, waa inaad mar walba jeebka ku sidataa kaadhka I-94-ka iyo kaadh-ka EAD-da, si loo garto inaad dalka sharci ku joogto. Qaxooti ahaan, waxa sharcigu kuu ogolyahay waxyaalaha soo socda:

- Inaad dalka meeshaad doonto u safri karto.
- Inaad iibsano karto dhul
- Inaad ka shaqaysano karto meeshaad doonto.
- Inaad wax-barano karto
- Inaad keensano karto carruurtaad dhashay ee kaa maqan haddii ay da'doodu ka yartahay 21 jir, kaana hadhay barakaca awgeed.

- Haddaad rabto in xaas amma carruur kaa maqani kugu soo biiraan, hay'addaada dib-u-dejinta ayaa kuu faahfaahin doonta waxyaalaha loo baahanyahay iyo dariiqa loo maro arrintaas.

Muddada xaaladdaadu tahay qaxootinimada, ma qaadan kartid baasaboortay Maraykanka ah, kuma biiri kartid ciidamada; ma footayn kartid, kamana shaqayn kartid shaqooyinka loo ogolyahay dadka dhalashada Maraykanka haysta oo keliya. Sidoo kale, inkastoo aad meeshaad doonto ee Maraykanka dhexdiisa ah u safri karaysid, waa inaad la socodsiiisaa USCIS-ta haddaad gurto. Waxa lagaa rabaa inaad USCIS-ta ku ogaysiiiso 10 casho gudahood haddaad badasho cinwaankaaga (aderayskaaga). Hay'addaada dib-u-dejinta ayaa kugu caawin karta sida loo buuxiyo foomamka loo baahanyahay.

Sidoo kale, muddada aad dalka ku joogto qaxootinimada, dibedda ugama bixi kartid dalka adigoon ogolaansho ka haysan USCIS-ta. Hadday khasab noqoto inaad dalka dibedda uga baxdo, hay'addaada ayaa kuu sharxi doonta sida ogolaanshaha loo codsado. Haddaad ku noqoto dalkaagii hooyo intaad weli qaxootiga tahay, waxa laga yaabaa in aan lagu ogolaan inaad dib usoo gasho Maraykanka.

Qofkii lab ah, da'diisuna u dhaxayso 18 iyo 25, waa inuu isqoro shaqada qaranka ciidamada oo loogu yeedhi karo markii loo baahdo, siiba waqtiyada dagaalka. Qofkii aan isku qorin shaqada qaranka ciidamada, laga yaabaa in loo diido deganaanshaha rasmiga ah iyo dhalashada Maraykankaba.

Markaad dalka deganaato sannad, waxa lagu ogolyahay inaad codsato deganaansho rasmi ah (permanent resident). Dadka sida rasmiga ah u deggan Maraykanku way ka bixi karaan kuna soo noqon karaan dalka, inkastoo loo ogolayn inay dibedda ku maqnaadaan muddo ka badan sannad. Waxa kaloo ay kamid noqon karaan ciidamada qalabka sida ee Maraykanka, laakiin ma footayn karaan, mana geli karaan shaqooyinka

Dawladda ee u baahan dhalasho Maraykan ah. Hay'ddaada dib-u-dejinta ayaa sharraxaad kaa siin karta sida lagu heli karo deganaansho rasmi ah.

Kadib markaad dalka deganaato 4 sano iyo sagaal bilood, waxaad dalban kartaa dhalasho Maraykan ah. Hay'adda USCIS-ta amma hay'addaada dib-u-dejinta ayaa ku siin karta sharaxaad ku saabsan sida lagu noqon karo waddani amma lagu heli karo dhalashada Maraykanka. Waxyaalaha lagaa rabo waxa kamid ah inaad tahay qof asluub wanaagsan leh, aqoon assaasi ahna u leh Af-Ingiriisiga, taariikhda Maraykanka iyo dawladda. Dadka qaata jinsiyadda Maraykanku waxay la xuquuq yihiin dadka Maraykanka dhaladka ah.



Maraykanku waa qaran ka kooban dad qaxooti amma imigaranti ah oo lasoo galay dhaqammo iyo caadooyin kala duwan oo u gaar ah. Sidaa darteed, ma jiro dhaqan Maryaykan gooni u ah. Hase ahaatee, dadka Maraykanku waxay ogolaadaan dadka qaxootiga ahna ka fishaan dhaqammo iyo asluubo “istaandar” ah. Waxa laga yaabaa in dhaqammadaas iyo asluubahaasi ka duwanaan karaan dhaqammadii iyo asluubihii waddankaagii hooyo, waxaana laga yaabaa inay kuula muuqdaan wax la yaab leh oo khilaafsan asluubaha ku dhaqankooda laga ogolaan karo waddankaagii. Balse haddaad noqoto qof furfuran oo foofjigan una jajaban isbaddalada, diyaarna u ah inuu su’aalo ka dhiibto waxyaalaha guraca ula muuqda amma ka fajiciya, waad ku guulaysan doontaa Maraykanka. Waa kuwan waxyaalaha loo baahanyahay inaad ka taqaanno dhaqanka, asluubta iyo dabeecadaha Maraykanka:

Dhexgalka. Dadka Maraykanku ahi waxay dadka u dhex-galaan si caadi ah oon ad-adkayn. Xafladaha iyo meelaha la isku arko, waxay iskugu yeedhaan magayadooda koowaad. Marka la joogo shaqada dhexdeeda ee aan weli si fiican la isku baran, waxa la iskugu yeedhaa magacyada faamiliga. Laakiin dadka madaxda ah iyo horjoogayaasha badankoodu waxay jecelyihiin inay isticmaalaan magaca koowaad ee qofka. Darajooyinka barofishannada dhakhtar, amma barofasoor, waxa la isticmaalaa hab maamuuska foomalka (formal) ah oo keli ah. Dadka Maraykanka ahi badanaaba markay dadka la kulmaan waxay u muujiyaan dhoolatus iyo farxad.

Ilaalinta waqtiga. Waqtigu aad buu dadka Maraykanka qiimo ugu leeyahy. Shaqadooda kama habsaamaan mana oggola dadka kalena inay ka habsaamaan shaqadooda. Waxa kaloo aad loo qiimeeyaa adkaynta iyo oofinta ballamaha kulamada iyo wada shaqaynta. Haddaanad ballan dhigan kahor intaanad xafiis booqan, lagama yaabo inay cidid kula kulanto. Haddii aad is leedahay ballan ma oofin kartid, amma aad filayso inaad dib uga dhacdo in ka badan 15 daqiiqadood, tilifoon u dir cidaad ballanta la leedahay. U sheeg inaad dib uga dhacayso ballanta kana cudur daaro oo raali geli.



Asturaadda (privacy). Dadka Maraykanku waxay ahmiyad gaara siiyaan asturaadda shakhsinimo. Dadku guryaha dadka kale iskama tegi karaan ayagoon marka hore usii sheegin. Arimaha dhaqaaluhu waa sir ah inay kuu asturnaato, dadkuna waxay u arkaan akhlaaq xumo haddaad weydiiso mushaharkoodu intuu yahay amma qiimaha gurigooda amma baabuurkooda. Waxa adaab xumo loo arkaa inaad su'aalo shakhsi ah wayddiiso qof aanad garanayn ammaba hadda kulanteen.

Nadaafadda iyo caafimaadka shakhsiga. Dadka Maraykanka ahi waxay jecelyihiin inay maalin kasta maydhaan (qubaystaan), ilkaha cadaydaan, timahooda dhaqaan, dharkoodana si joogto ah u nadiifiyaan. Dukaamada waxa lagu iibiyaa waxyaalo fara badan oo loogu talo-galay nadaafadda oo wasakhda lagaga maydho jidhka iyo dharka si looga biiyo urta xun ee dhididka dadka. Nadaafadda shakhsigu waxay gaar ahaan muhiim u tahay helitaanka iyo haysashada shaqada.

Baqshiiska (tip). Waxa caado ah in laga bixiyo baqshiish ah 15% amma 20% biilka cuntada hudheelada iyo takaasida. Weligaa ha isku deyin inaad lacag baqshiish ah siiso sarkaal booliis ah amma shaqaale dawladeed si aad uga mahad celiso hawl uu kuu qabtay.



Khamriga iyo Sigaar Cabidda. Inkastoo khamrada (khamriga) lagu cabbo Maraykanka, haddana waxa jira sharciyo farabadan oo loo dejiyay isticmaalkiisa iyo iibkiisa. Cabidda khamrigu (khamaradu) waa ikhtiyaarka shakhsiga, akhlaaq xumana ma aha haddaad diiddo inaad cabto. Dad badan oo Maraykan ah ayaan cabin sigaarka waxaanay dadka kalena ka filayaan in aanay markay soo booqdaan guryahooda ku cabbin.

Nabadgelyada Shakhsiga. In kastoo danbiga dagaalka iyo rabshaduhu ka dhacaan Maraykanka dhexdiisa, tirada danbiyada ka dhaca waxay ku kala gedisanyihiin meelaha ay ka dhacaan. Adoon u eegin meeshaad degantahay nabadgelyadeeda iyo nabadgelyo la'aanteed, waa inaad mar walba taxadartaa ood hubisaa inaad qufusho gurigaaga iyo baabuurkaaga. Weligaa jeebka ha ku qaadan lacag farabadan oo kaash ah, iskana ilaali inaad tagto xaafadaha iyo meelaha danbiyado ku badanyihiin.

Aqoonsiga Shakhsiga (teesarada). Maadaama ay tirada dadka Maraykanku aad u badantahay, dadka Maraykanku waxay isticmaalaan siyaabo la isla yaaqaan oo aqoonsi ah haddii ay noqoto la macaamilka dawladda amma la macaamilka shirkadaha ganacsiga. Waa inaad mar kasta sidataa koobi kamid ah kaadhkaaga I-94-ka iyo ka EAD-da, iyo weliba magacaaga, cinwaankaaga (adreeskaaga)



lambarka tilifoonkaaga iyo tilifoonka hay'addaada.Haddaanad ku hadli aqoon Ingiriisida, waa inaad mar walba jeebka ku sidataa lambarka tilifoonkaaga, amma adreeskaaga, iyo tilifoonka qof kamid ah cidda aad booqanayso.

Barashada dabecadaha iyo qiimaha dadka Maraykanka iyo la macaamilkoodu waa qayb kamid ah la qabsashada dhaqanka cusub ee Maraykanka. La qabsashadu maaha inaad ka tagto amma daadiso dhaqankii iyo hiddahaagii hore gebi ahaatiisba.

Run ahaantii, dadka qaxootiga badankoodu waxay dareensanyihiin inay si fiican ugu guulaysteen la qabsashada nolosha cusub, waxaanay barten sida la isku waafajiyo qaybo kamid ah dhaqanka Maraykanka iyo dhaqankooda.

Xammilaadda dhaqan-argagaxa (shoogga dhaqanka) iyo warwarka (istrees)

Dhaqan-argagaxa waxaa kamid ah dareenkaaga ah inaad tahay qof aan miciin haysan oo isku buuqsan oo la dhex dhigay waddan iyo dad aanu afkooda ku hadal, dhaqankoodana aqoon. Dhaqan-argagaxu waa wax caadi ah oo ku dhaca qof kasta oo doonaya inuu ku noolaado dal cusub.

La qabsiga dhaqanka iyo isbadalka nolosha

Haddii uu shoog dhaqan ku haysto (dhaqan-argagax), waxa laga yaabaa inuu dareenkaagu yahay sidan:

- Inaad ka walaacsanatahay karti darridaada aad ugu maaro wayday hawl-maalmeedyadaada, kuna raaci kari wayday, gaadiidka dadweynaha.
- Inaad dareemayso daal siyaado ah maalinnimada, habeenkiina seexan kari weydo.
- Inaad si dhib yar u cadhooto.
- In aanad kala jeclayn wixii dhaca
- Inaad cuntada ka go'do.

Usoo guurka dal cusub oo qalaad waxay qaxootiga badankooda ku tahay wax dhib iyo walaac badan. Qof walba si u gaar ah ayuu walaacu ugu dhacaaa, laakiin waxa jira dareemmo (dareen) dadkoo dhan ka dhaxeeya ood isku arki karto, sida himilo darro iyo isku kalsooni la'aan, ciddaad tahay ood garan weydo, iyo niyad jab kugu dhaca. Dareemmada noocan ahi badanaaba waa ku meel gaadh waanay kaa haadaan aakhirka. Dad badan oo Maraykanka ku cusub ayay dareemadani soo mareen, aakhirkiina awooday inay adkaysi iyo dulqaad u yeeshaan dareemmadaasi.

Mararka qaarkood, walaacu wuxuu kuu horseedaa dhibaato inaad kala kulanto hanashada hawl-maalmeedkaaga, xallinta xurgufaha iyo dhibaatooyinka ka dhex aloosma raaska (faamiliga) dhexdiisa. Waxa lagama maarmaan ah inaad garato walaacaad dareemayso, kana tabaabushaysato, lana timaadid xeelado iyo xirfado aad ku maarayso.

Shakhsiyaadka amma dhaqammadu waxay yeelan karaan siyaabo iyaga u gaar ah oo ay u maareeyaan dhaqan-argagaxa (culture shock). Waxa laga yaaba inaad durba samaysatay tabo aad ku muquuniso, sida adigoo cunto fiican cuna, sameeya jimicsiga jidhka (physical exercise), hurdo fiican seexda, asxaabtaada la baashaala, ka qayb qaata xafladaha bulshada, samaysta himilooyin aad higsato, Ilaahayna cuskato oo tagto meelaha Ilaahay lagu caabudo, sida massajiddada. Dadka qaar waxay werwerka iyo walaacu ka ba'aan markay sameeyaan wax ay jecelyihiin

amma ay ku raaxaystaan ciyaar ay jecelyihiin, amma ay miyuusig (music) dhagaystaan. Tab ay isticmaalaan dadka cusub badidoodu waxay tahay inay kamid noqdaan ururrada ay leeyihiin dadka ay isku waddanka ka yimaadeen amma ay isku jinsiyadda yihiin.

Caawimo arrimahan la xidhiidha wayddiiso hay'addaada dib-u-dejinta.

Isbeddalka Kaalinta Xubnaha Qooyaska

Dib-u-dejinta dhibaatooyinkeeda ugu walaaca badan waxa kamid ah isbadal ku dhaca xubnaha faamiliga (raaska)waajibaadyadooda (xilalkooda). Aabaha, hooyada, carruurta yaryar iyo waayeelkuba waxay ogaadaan in nolosha iyo dhaqanka Maraykanku wax weyn ka badalo xidhiidhka dhexdooda. Waa arrin dhibaato keenta marka hore, inkastooy tahay qayb caadi ah oo kamid ah hawlaha dib-u-dejinta.

Ragga iyo dumarkuba waxay dhibaato kala kulmaan siday ula qabsan lahaayeen kaalintooda cusub. Dadka Maraykanku waxay rumaysan yihiin in raga iyo dumarku simanyihiin, waxaana qiimo la leh isku-filaanshaha iyo madax bannaanida ragga iyo dumarka labadoodaba. Rag iyo dumarba waa la wada shaqeeyaa, hawsha guriga iyo xannaanada carruurtana waa la wada qaybsadaa.

Qooyaska qaarkood, marka ay labada waalidba shaqeeyaan, waxa laga yaabaa inay haweenayda gurigu (wife) ka mushahar badnaato odayga guriga (husband). Raasaska qaarna, waxa laga yabaa in haweenaydu shaqo hesho, odayguna shaqo waayo. Markay taasi dhacdo, waxa odaygii laga filayaa inuu carruurta xannaaneeyo markay iskuulka ka soo rawaxaan. Xaaladaha sidaa isku badalay ayaa keena in ragga qaxootiga ahi dareemaan inay ka luntay madaxtinimadoodii. Dumarkuna waxay dareemaan kalsooni cusub, dhinacna waxay ka dareemaan inay danbi ka galeen (meel kaga dhaceen) ragga.

Dib-u-dejinta waxa dhibaato aad u culus kala kulma dhalin-yarada, gaar ahaan kurayada, waayo, dhinac waxay ka rabaan inay noloshii

cusbayd kala qabsadaan, dhinaca kalena inay dhaqankoodii iyo hiddahoodii haystaan. Taa waxa ugu biirta ayadoo ay gelayaan waqtigii baaluqa ee ay isku qabeen inay rag yihiin, arrintaasoo dhibaatooyinkeeda iska leh.

Madaama ay Af-Ingiriisiga ka hor bartaan waalidkooda, dhalin-yaradu waxay turjumaanno u noqdaan waalidiintooda taasoo siisa waajibaad cusub (kaalin cusub). Badanaaba, iskuulna way tagaan, waanay shaqeeyaan. Waalidiintu ma awoodaan inay taageero siiyaan, sababtoo ah, luqaddooda iyo aqoontooda waxbarashada Maraykanka oo xaddidan. Dhalinta qudhooda waxa ku adkaata inay waalidka is fahmaan.

Mar haddii walaaca iyo dhibaatooyinku sii siyaadaan, dhalintu waxay halis ugu jiraan inay yeeshaan dabecado xunxun, sida inay: ka maqnaadaan iskuulka, ku biiraan kooxo budhcad ah (gangs), amma isticmalaan daroogada. Dabecadaha noocaas ahi waxay horseedaan dhibaatooyin kasii ballaadhan oo danbi ah. Hablaha dhalinta ah een weli la guursanna, waxa ku dhaca dhibaatooyin ay ka mid yihiin inay uur yeeshaan iyagoon la qabin.

Isbeddalka kaalintu waxay sidoo kale walaac ku keentaa dadka waayeelka ah. Odaygii reerka madaxa u ahaa ee aqoonta lahaa ayaa isu arka inaanu hadda waxba ahayn. Maraykanka waxa aad looga tixgeliyaa dhalinyarada tamartooda iyo wax-soosaarkooda, taasoo waayeelka ka dhigta wax laga tegay oon faa-iido lahayn. Dhibaatooyinka lagala kulmo barashada afka iyo dhaqanka cusub ayaa iyana keenta dareen gooni iyo ciirsi la'aan ah. Badanaaba, waayeelku waxay dareemaan inaan ixtiraam iyo qadarin loogu haynin bulshada dhexdeeda.

Dhibaatooyinka dhinaca dhaqaalaha ayaa ayaguna ah kuwo waayeelka culays badan ku haya oo ka xoog badtay. Odayaal waaweyn oo filayay inay shaqada ka fadhiistaan si ay u qaataan lacagta hawl-gabka ayaa ku khasbanaada inay shaqeeyaan, gaar ahaan kuwa da'doodu ka yartahay 65 jir. Kuwa da'doodu ka weyntahay 65 jir, waxay ogaadaan: in xuquuqda hawl-gabnimadu aanay ahayn waxay filanayeen, in xuquuqda awood

darradu aanay dabooli karin kharashyadooda caafimaadka, iyo in aanay faamiliyadooda ka heli karin taageero lamid ah tay kaga heli jireen markay dalkooda jooheen. Dhibaatooyinkan dhaqaale ooy ugu biirtay hankoodii oo ay lumiyeen iyo dareen ciirsi la'aan ah, ayaa u horseeda niyad jab iyo dhibaatooyin kale oo xagga maskaxda ah.

Hadday dhacdo in adiga amma xubin ka mid ah qooyaskaagu aad waxba ka qaban kari waydaan walaaca iyo warwarka idinka haysta la qabsiga noloshiinna cusub ee Maraykanka, waa inaad isla markiiba raadsataan cid idinla talisa. Arrimaha ay ka midka yihiin waajibaadka xubnaha raaska (faamiliga) waxa si furan loogaga dooda kulamada iyo kalaasyada Hanuuninta Dhaqanka, amma waxa kaala hadla qofka arrimaha qooyaskaaga qaabilsan ee Maraykanka ah. Hay'addaada dib-u-dejinta ayaa kugu caawin karta inay kuu hesho siyaabahaad uga hortagi lahayd dhibaatooyinka aad kala kulanto nolosha cusub werwerkeeda.

Di-u-dejintu waa shaqo qaadata waqti aad u dheer. Waxa laga yaabaa inay kugu qaadata min 2 ilaa 5 sannadood inaad si buuxda ula qabsato nolosha degaankaaga cusub. Weligaa ku dadaal inaad indhaha uun wax ka eegto hana noqon midka go'aanka ku degdega. Yeelo himilooyin aad higsato. Daacadnimo aad kula xidhiidho, dulqaad iyo wada shaqayn wacan oo aad la yeelato dadka ku caawinaya ayaa suurtagal ka dhigi kara in si fiican lagu dejiyo. Waxa kalooy arrimahaasi kugu caawinayaan inaad fahamto qiimaha assaasiga ah ee maraykanka, sida isku kalsoonida, iyo madax bannaanida. La qabsashada dhaqan cusubi waa dhibaato adag, oo haddana horumar iyo faa-iido laga heli karo.


“ Dareenkayga ku aaddan waddankan aad ayuu uga duwanyahay kii aan qabay markii iigu horreysay halkan. Markaan Feetnaam (Vietnam) joogay, waxan u malayn jiray in imaatinka Maraykanku la mid yahay jannada ama wax kale. Sidaasi ayay dadku iigu warrami jireen.


Hadda uma haysto inay janno la mid tahay. Waxay dhaantaa uun Feetnaam.”

“ Inkastoo an ku noolnahay Maraykanka, waxaan weli xaq u leenahay inaan xasuusnaanno oon xajisanno dhaqankayaga. Waxaan barannaa nolosha dadka Maraykanka ah iyo caadooyinkooda. Waxaan ku dayannaa oo an raacnaa caadooyinka qaarkood, isla markaa haddana waa inaan ogaanna, walow annaan dalkayagii haysan, weli waxaan xasuusanna, aqoonsannaa oon qadarinnaa hiddaha iyo dhaqankayaga. Soo dhowaada dhamantiin inta halkan u soo socota.”

“ Wax kasta oo la xidhiidha noloshan kuma baran kartid laba bilood gudahood. Waxay qaadataa sannado iyo sanooyin.”

“ Sannadkii na soo dhaafay isbadel ayaa igu dhacay. Xiisahii badnaa ee an dalkayga hooyo u qabay horraantii imaatinkayga hadda ma qabo, waxyaabaha igu cusubna kama baqo. Waxan ogaaday in Afka Ingriisiga oo la bartaa kuu horseedayo in la helo shaqo tii hore dhaanta.”





Gobolada Dalka Maraykanka